# *ARKAANTA IIMAANKA*

Arkaanta iimaanka waxey ka koobantahay rumeynta : alle iyo malaaiktiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo maalinta aakhiro iyo qadarka kherkiisa iyo shartiisa.

Alle wuxuu yiri :

﴿ وَلَٰكِنَّ ٱلۡبِرَّ مَنۡ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةِ وَٱلۡكِتَٰبِ وَٱلنَّبِيِّـۧنَ﴾ [سورة البقرة: الآية ١٧٧].

Macneheedana waxaa waaye:"… laakiin sama falaha waa ruuxa ruumeeya alle iyo maalinta aakhiro iyo malaaikta iyo kitaabka iyo nabiyada "

Alle wuxuu yiri :

ا كُلٌّ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَمَلَٰٓئِكَتِهِۦ وَكُتُبِهِۦ وَرُسُلِهِۦ لَا نُفَرِّقُ بَيۡنَ أَحَدٍ مِّن رُّسُلِهِۦۚ ...﴾ [سورة البقرة: الآية ٢٨٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waa rumeeyay rasuulki wixi looga soo dejiyay xaga rabigiis , muminiintana wey rumeeyeen , mid walbana wuxuu rumeeyay alle iyo malaaiktiisa

iyo kutubtiisa iyo rusushiisa , mana kalageyneyno rusushiisa..."

وقال تعالى :

﴿ إِنَّا كُلَّ شَيْءٍ خَلَقْنَٰهُ بِقَدَرٍ ﴿٤٩﴾ ﴾ [سورة القمر: الآية ٤٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:" anagaa wax walba ku abuurnay qadar(qiyaas) "

وقال النبي صلى الله عليه وسلم(الايمان ان تومن بالله وملائكته وكتبه ورسله واليوم الاخر وتومن بالقدر خيره وشره )رواه مسلم

Nabiguna –naxariis iyo nabad dushiisa allaha yeelee- wuxuu yiri :"iimaanku waa in aad rumayso alle iyo malaaiktiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo maalinta aakhiro iyo qadarka kherkiisa iyo shartiisa ".

Marka iimaanku waxuu kan koobanyahay hadal carabka looga dhawaaqo iyo rumen qalbiga laga rumeyo iyo fal xubnaha lagala yimaado,camalka suubanna wuu ku kordhaa, macaasida iyo camalka xunna wuu ku nuqsaamaa

وقال تعالى :

﴿ إِنَّمَا ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ ٱللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُهُۥ زَادَتْهُمْ إِيمَٰنًا وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٢﴾ ٱلَّذِينَ

يُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَمِمَّا رَزَقۡنَٰهُمۡ يُنفِقُونَ ﴿٣﴾ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ حَقّٗاۚ لَّهُمۡ دَرَجَٰتٌ عِندَ رَبِّهِمۡ وَمَغۡفِرَةٞ وَرِزۡقٞ كَرِيمٞ ﴿٤﴾ ﴾ [سورة الأنفال: الآية ٢-٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:"muminiinta waa uun kuwa marki alle la xuso ay cabsato quluubtooda, marki lagu dul akhriyo aayaatkiisana waxey u kordhisaa iimaan , rabigoodna tala saartaan, ahna kuwa oogo salaada waxaan ku irsaaqnana wax kabixiyo , kuwaas waaye kuwa muuminiinta xaqa ah "

وقال تعالى :

﴿ وَمَن يَكۡفُرۡ بِٱللَّهِ وَمَلَٰٓئِكَتِهِۦ وَكُتُبِهِۦ وَرُسُلِهِۦ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِ فَقَدۡ ضَلَّ ضَلَٰلَۢا بَعِيدًا ﴿١٣٦﴾ ﴾ [سورة النساء: الآية ١٣٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ruuxi ku gaaloobo alle iyo malaiktiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo maalinta aakhiro si xaqiiqo ah ayuu u baadiyoobay baadi fog"

Hadaba iimaanka carrabka ayaa looga dhawaaqaa,sida : dikriga alle iyo ducada iyo wanaaga oo lees faro iyo xumaanta oo leska reebo iyo quraanka oo la akhriyo iyo wixi lamid ah

Qalbigana iimaanku waa ka sugmaa sida rumeenta u kalinimada alle uu u kali yahay

rabinimada iyo ilaahnimada iyo magacdiisa iyo sifaadkiisa iyo in ey waajib tahay alle kaliya in la caabudo iyo wixi lamid ah oo qalbiga laga rumeeyo.

Sidoo kale waxaa soogelayo iimaanka acmaasha qalbiga, sida : alle in la jeclaado lagana cabsado lana talasaarto iyo wixi la mid ah .

Waxaa kale oo soo gelayo iimaanka acmaasha xubnaha, sida : salaada iyo soonka iyo xajka iyo ku jihaadka jidka alle iyo cilmiga oo labarto iyo wixi lamid ah .

وقال تعالى :

﴿ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُهُۥ زَادَتْهُمْ إِيمَٰنًا ﴾ [سورة الأنفال: الآية ٢].

Macnaha aayada waa lasoo dhaafay

قال تعالى :

﴿ هُوَ ٱلَّذِىٓ أَنزَلَ ٱلسَّكِينَةَ فِى قُلُوبِ ٱلْمُؤْمِنِينَ لِيَزْدَادُوٓا۟ إِيمَٰنًا مَّعَ إِيمَٰنِهِمْ ﴾ [سورة الفتح: الآية ٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ale waa kan ku soo dejiyay xasiloonida quluubta muuminiinta si ay iimaan ugu kororsadaan iimaankoodi "

Iimaankuna waa kordhaa mar walbo oy kororto cibaadada adoonka iyo falalka suuban uu alle ugu dhawaanayo .
waana nuqsaamaa markay yaraato cibaadada adoonka .

Macaasidana sidoo kale iimaanka way waxyeeleysaa oo hadey macaasidaas shirkigi weynaay tahay iimaanka dhan ayay buridaa hadii ay tahayna shirki wax kayarna iimaanka dhamestirkiisa ayay burisaa oo iimaan buuxo manoqanaayo

قال تعالى :

ا إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغۡفِرُ أَن يُشۡرَكَ بِهِۦ وَيَغۡفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ لِمَن يَشَآءُۚ ... ﴾ [سورة النساء: الآية ٤٨].

Macnaha aayada waxaa waaye:"alle ma dhaafo in lala wadaajiyo , waxowsa ka dhaafaa wixi ka soo haro ruuxuu doono"

قال تعالى :

ا يَحۡلِفُونَ بِٱللَّهِ مَا قَالُواْ وَلَقَدۡ قَالُواْ كَلِمَةَ ٱلۡكُفۡرِ وَكَفَرُواْ بَعۡدَ إِسۡلَٰمِهِمۡ ... ﴾ [سورة التوبة: الآية ٧٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxey ugu dhaaranayaan alle in aysan dhihin , waxasa xaqiiqa ah in ay dheheen hadalki gaalnimada , weyna gaaloobeen islaamkoodi ka dib"

وقال صلى الله عليه وسلم: ( لا يزني الزاني حين يزني وهو مؤمن، ولا يسرق السارق حين يسرق وهو مؤمن،ولا يشرب الخمر حين شربها وهو مؤمن )متفق عليه.

Xasdiiska macnihiisana : masinaysanayo kan sineysanayo markuu sinaysanayo asiga oo muumin ah ,mana xadayo kan wax xadayo markuu xadayo asiga oo mumin ah ,man cabayo khamrada  markuu cabayo asiga oo mumin ah .

## *Rukniga koowaad*
## *Rumenta Alle caza wajalla*

(1)-TAXQIIJINTIISA :

waxuu ku sugmayaa iimaanka alle waxyaabaha soo socdo :

KOOW/ Rumenta in ow konkaan leeyahay hal rabbi oo kali u ah abuuritaankiisa iyo lahaantiisa iyo daberi taankiisa iyo kala wadida umuurihiisa arsaqad hanoqoto ama awood ama noolen ama dilid, ama dheef ama dhib, leheena koonkaan rabi kale , wuxuu doono ayuu kaligii sameynayaa wuxuu doono ayuuna xukmiyaa, qofkuu doono ayuu ciseyaa, qofkuu doonana waa duleeyaa,cirka iyo dhulkuna xukunkiisa ayay ku jiraan, asiga ayaana wax walba awoodo wax walbana og kana kaaftoon wixi asiga kasoo hara, amarka oo dhana asiga ayaa leh, kherka oo dhana gacantiisa ayuu ku jiraa ,wadaag falalkiisa la wadaagayana majiro, ruux awoodiisa ka baxsanna majiro , iskaba dhaaf taase abuurka oo dhan oy kamid yihiin malaaikta iyo dadka iyo jiniga adoomo ayay asiga u yihiin, kama baxayaan boqortooyadiisa iyo awoodiisa iyo rabitaankiisa,falalkiisana lama koobi karo oo

tiro makoobi karto,tilmaamahaas oo dhan kaligii ayaa iskaleh ,wax la wadaagana malaha , mana istaahilo qof aan asiga eheyn mana banaano in loo tiiriyo ama loo sugo wax kamid ah falalkiisa cid aan asiga eheyn.

قال تعالى :

﴿ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱعْبُدُوا۟ رَبَّكُمُ ٱلَّذِى خَلَقَكُمْ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿٢١﴾ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلْأَرْضَ فِرَٰشًا وَٱلسَّمَآءَ بِنَآءً وَأَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَخْرَجَ بِهِۦ مِنَ ٱلثَّمَرَٰتِ رِزْقًا لَّكُمْ ... ﴾

[سورة البقرة: الآيتان ٢١ ، ٢٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:"war dadow caabuda rabigiini idin abuuray adinka iyo kuwi idinka horreyay, waxaadna mudantihiin in aad alle ka dhowrsataan"

قال تعالى :

﴿ قُلِ ٱللَّهُمَّ مَـٰلِكَ ٱلْمُلْكِ تُؤْتِى ٱلْمُلْكَ مَن تَشَآءُ وَتَنزِعُ ٱلْمُلْكَ مِمَّن تَشَآءُ وَتُعِزُّ مَن تَشَآءُ وَتُذِلُّ مَن تَشَآءُ ۖ بِيَدِكَ ٱلْخَيْرُ ۖ إِنَّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٦﴾ ﴾ [سورة آل عمران، الآية: ٢٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxaad dhahdaa allahayow xukunka adigaa leh , waxaad siisaa xukunka qofkaad doonto, waadna ka qaadaa xukunka qofkaad doonato,

waxaadna ciseysaa ciddaad doonto , waxaadna dulleysaa ciddaad doonto , gacantaada ayuu kherka ku jiraa, adiga ayaana wax walba awoodo "

قال تعالى :

﴿ وَمَا مِن دَآبَّةٍ فِي ٱلْأَرْضِ إِلَّا عَلَى ٱللَّهِ رِزْقُهَا وَيَعْلَمُ مُسْتَقَرَّهَا وَمُسْتَوْدَعَهَا ۚ كُلٌّ فِي كِتَٰبٍ مُّبِينٍ ﴾ [سورة هود، الآية: ٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ma jirto daabad dhulka ku sugan illaa risiqeeda alle dul saaranyahay maahane , ogyahayna meesha ay ku hoyan iyo meesha ay ku dhiman , dhamaanna kitaab cad ayay ku suganyihiin "

قال تعالى :

﴿ ... أَلَا لَهُ ٱلْخَلْقُ وَٱلْأَمْرُ تَبَارَكَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴾

[سورة الأعراف، الآية: ٥٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:"war hoy abuurka iyo amarka allow u sugnaaday , barakoobay oo weynaayay barabaariyaha caalamka "

LABO/ Rumenta in uu alle kaligii leeyahay magacda kuwa ugu wanaagsan iyo sifaadka kuwa ugu dhamestiran , kuwaas uu qaarkod ku baray adoomanka kitaabkiisa ama sunada nabigiisa ha ahaato dushiisa naxariis alle iyo

nabad gelyo

قال تعالى :

﴿ وَلِلَّهِ ٱلْأَسْمَآءُ ٱلْحُسْنَىٰ فَٱدْعُوهُ بِهَا ۖ وَذَرُوا۟ ٱلَّذِينَ يُلْحِدُونَ فِىٓ أَسْمَٰٓئِهِۦ ۚ سَيُجْزَوْنَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٨٠﴾ ﴾

[سورة الأعراف، الآية: ١٨٠].

Macnaha aayada waxaa waaye:"alle waxaa u sugnaaday magacyo wanaag badan ee ku barya , kana taga kuwa qaloocinayo magacdiisa waxaana lagu abaal marin doonaa waxa ey camal faleen"

وقال صلى الله عليه وسلم:(إن لله تسعة وتسعين اسما من أحصاها دخل الجنة وهو وتر يحب الوتر)متفق عليه

xadiisku macnahiisu waa : alle waxaa u sugnaaday sagaal iyo sagaashan magac ,qofki kooba oo ku camal falo janaduu galay, asigana waa hal oo tirada is dheer ayuu jecelyahay "

Ictiqaadkan waxaa asal u ah labo asal oo waaweyn :

(1) - Alle wuxuu leyahay magacda wanaagsan iyo sifaatka sarreeya oo dhamestiran, manajirto cid la wadaagto alle magacdiisa iyo sifaadkiisa oo khalqigiisa ka mid ah .

magacdiisana waxa kamid ah (الحي)"noole" waxaana u sugnaaday sifada nolosha, taas oo waajib ah in loogu sugo wajiga ugu dhamestiran oo ku habon asiga, noloshaasna waa nolol dhamestiran oo joogto ah waxaana ku kulmay cilmi iyo awood iyo wax yaaba kale, nolosha allana billaw hore iyo dhamaad danbe ma laha.

قال تعالى :

﴿ ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلۡحَيُّ ٱلۡقَيُّومُۚ لَا تَأۡخُذُهُۥ سِنَةٞ وَلَا نَوۡمٞۚ ... ﴾ [سورة البقرة، الآية: ٢٥٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:"alle maahane ilaah akle oo xaq lagu caabudo ma jiro waana kan nool oo u istaagsana maamulka khalqiga , maqabto lilmo iyo hurdaba "

(2) - Alle wuu ka dahirsanyahay sifadka dhiman oo ceebta ah sidoodaba, sida: hurdo iyo awaod la aan iyo jahli iyo gardarro iyo waxa lamidka ah,allana la mid ma'ahan adomankiisa.

waxaa waajib ah marka in alle laga reebo wax walba uu naftiisa ka reebay iyo waxa uu karebay rasuulka -ha ahato naxariis alle iyo nabadi dushiisa- rabigiis, lana rumeyo in ilaahey ku sifeysanyahay sifaadka dhamestiran

lagana reebo kuwa ka horjeeda oo ah sifaadka xunxun.

قال تعالى :

﴿ ... لَيْسَ كَمِثْلِهِۦ شَىْءٌ ۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ ﴾ [سورة الشورى،الآية: ١١].

Macnaha aayada waxaa waaye:" majiro wax isaga la mid ah waana maqle arag badan "

قال تعالى :

﴿ ... وَمَا رَبُّكَ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ﴾ [سورة فصلت، الآية: ٤٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ma aha raabigaada mid dulmi badan adoomanka "

قال تعالى :

﴿ ... وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُعْجِزَهُۥ مِن شَىْءٍ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ ... ﴾ [سورة فاطر، الآية: ٤٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:"ma aheyn alle mid ay caajis geliyaan wax samooyinka iyo dhulka ku sugnaaday"

قال تعالى :

﴿ ... وَمَا كَانَ رَبُّكَ نَسِيًّا ﴾ [سورة مريم، الآية: ٦٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:" me eheen rabigaa mid hilmaan badan"

Rumenta magacda alle iyo sifaadkiisa iyo ficiladiisa, waa jidka kaliya oo alle lagu garan karo laguna caabudi karo sababtuna waxa waaye: alle oo kaqariyay khalqiga inta ey nolosha aduunyo jogaan in ay asiga indhaha ku arkaan laakin wuxuu u furay albabkan aqoneed oo ey ku garankaraan rabigoda iyo key cabudayaan wexeyna ku cabudayaan sida ay tahay aqontaas saxiixa ah .

ruuxi alle sifaadkiisa oo dhan inkirayna wuxuu caabudayaa wax aan jirin, kan alle kumetelay adoomankiisana wuxuu caabudayaa sanam. muslimkana wuxuu caabaudayaa allaha kaliga ah oo loo qasdo waxna la weydiisto,oo dhalin lana dhalin,mana ahaanin qof la mid ah.

Marka loo sugayo alle magacdiisa suuban waa in la ilaaliyo umuuraha soosocdo :

(1) – in loo sugo alle dhamaan magacda ku soo aroortay quraanka iyo sunada, looguna sugo siday ku soo aroortay iyadoo waxna lagu dareen waxna laga dhimeen.

قال تعالى :

ا هُوَ ٱللَّهُ ٱلَّذِى لَآ إِلَـٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلْمَلِكُ ٱلْقُدُّوسُ ٱلسَّلَـٰمُ ٱلْمُؤْمِنُ ٱلْمُهَيْمِنُ ٱلْعَزِيزُ ٱلْجَبَّارُ ٱلْمُتَكَبِّرُ ۚ سُبْحَـٰنَ ٱللَّهِ عمَّا

﴿ يُشْرِكُونَ ﴾ [سورة الحشر، الآية: ٢٣].

Macnaha aayada waxaa waaye:"isaga waa allihi uusan jirin ilaah xaq lugu caabudo asiga maahane ,waa boqor daahir ah nabadgeliye ah , rumeeye ah , wax walbana hesta , guuleste ah ,awood iyo kibir badan,waana kanasahanyahay waxa ey la wadaajinayaan "

وثبت في السنة أن النبي صلى الله عليه وسلم سمع رجلا يقول:اللهم إني اسالك بأن لك الحمد لا إله إلا أنت المنان، بديع السموات والارض،يا ذا الجلال والإكرام، يا الحي يا القيوم . فقال النبي صلى الله عليه وسلم تدرون بما دعا الله ؟ قالوا الله ورسوله أعلم ، قال : والذي نفسي بيده لقد دعا الله باسمه الاعظم الذي إذا دعي به أجاب وإذا سئل به أعطى )

رواه أبو داود وأحمد

Waxaa ku sugnaaday sunada nabiga -naxariis alle iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee- in uu maqlay nin dhahayo : allow waxankugu weydiisanayaa in ey mahadda adiga kuu sugnaatay ilaah kale oo xaq lagu caabudana uusan jirin adiga mooyaane,galadeysiga badnaay,abuuray samooyinka iyo dhulka, weynaay oo sharafta lahaay noolaay oo u istaagsanaay umuraha khalqiga .

Markaas buu nabiga yiri : mataqaanaan waxa uu alle ku barayay ? markaasey dheheen

saxaabadi : alle iyo rasuulkiisa ayaa og. Markaasuu yiri: waxaan ku dhaarta kii gacantiisa nafteyda kujirtaye wuxuu alle ku baryay magaciisi waynaay oo hadii lagu baryo ajibo hadii lagu waydiistana siiyo) waxaa wariyay abuu dawuud iyo axmad .

(2) - Rumenta in uu alle asiga isku magacaabay magacdaan kuna magacaabin qof khalqigiisa ka mid ah asiga ayaana naftiisa ku amaanay magacdaas,mana aha wax cusub oo la abuuray.

(3) – Rumeenta magacda alle in ay kutuseyso macno aad u dhamestiran oo naqsi ku jirin waji walba,waxaana waajiba in la rumeyo macnaha ay kutuseyso sida ay waajib u tahay in larumeyo magacdaas .

(4) - Waxaa waajiba in la ixtiraamo macnaha magacdaas ey leedahay lana bedelin lana cadilin

(5) - Rumenta waxa ka waajib naqanaya magac walba oo magacdaas kamid ah oo axkaam ah iyo waxa kataratub mayo oo falal ah .

Si ay u cadaato shanta arrimood oo lasoo dhaafay waxaan tusaalo ahaan u soo qaadanaynaa magaca alle oo ah (السميع)"maql badne" waxaana waajib ah in aad rumeyso waxyaabaha soo socdo:

(A)- rumenta in uu suganyahay magaca "maqle" yahayna magac kamid ah magacda alle maxaa yeelay waxuu ku sugnaaday quraanka iyo sunada

(B) - rumenta in uu alle asiga naftisa ku magacaabay magacaas,kuna dhawaaqay, kuna soo dejiyay kitaabkiisa .

(T)- rumenta in uu magaca "maqle" kutusayo sifada "maqalka" tahayna sifo ka tirsan sifadkiisa.

(J) - Waxaa waajiba in la ixtiraamo sifada "maqalka" oo uu ku tusayo magaca "maqle" lana bedelin macneheeda lana cadilin.

(KH) - Rumenta in uu alle maqlo wax walba maqalkiisuna waasic u naqday hadalada oo dhan iyo in la rumeyo waxa kataratub mayo arrinkaas oo ah alle oo leska ilaaliyo lagana cabsado lana yaqiinsado alle inaysan waxba kaqarsooneyn .

Waxaa kaloo wajib ah in la ilaaliyo marka lasugayo sifaadka alle waxybaaha soosocdo:-

(1)- sugida sifaadka ku soo arooray quraanka iyo sunada iyadoo waxba laga bedeleyn lana cadileyn.

(2) - In laictiqaado ictiqaad goan alle inuu ku sifeysan yahay sifaad dhamestiran , lagana nazaho sifa walba oo dhiman ama ceeb ah .

(3) - In ay sifaadka alle lamid eheyn sifaadka makhluuqa , maxaa yeelay majiraan wax alle lamid ah sifaadkiisa hanoqoto ama falalkiisa

قال تعالى :

﴿ لَيْسَ كَمِثْلِهِۦ شَىْءٌۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ ﴿١١﴾ ﴾ [سورة الشورى، الآية: ١١].

Macnaha aayada waxaa waaye:"majiro wax isaga la mid ah waana maqalbadane arag badan"

(4) - In laga quuston in la ogaado keyfiyada ay sifadaas u taalo maxaa yeelay ma ogo sifada alle sida ay u taal cid aan asiga aheyn.

(5) - rumenta waxa kataratub mayo sifaadkaas oo axkaam ah .

Si aan u cadeyno arrimaha shanta ah oo lasoo dhaafay waxaan tusaalo ahaan u soo qaadanaynaa sifada (الاستواء)"alle in uu carshigiisaka sareeyo" waxaana waajiba ah sifadaan marka lasugayo in lailaaliyo arrimaha soo socdo :-

(A)- in la rumeeyo alle in uu carshigiisa ka sara maray,waxaana taas daliil u ah aayaddan:

قال تعالى :

﴿ ٱلرَّحْمَٰنُ عَلَى ٱلْعَرْشِ ٱسْتَوَىٰ ﴿٥﴾ ﴾ [سورة طه، الآية:

.[٥

Macnaha aayada waxaa waaye:"raxmaanki carshiga ayuu ka kor maray "

(B) - In loo sugo sifada istawaha alle sida ugu dhamestiran oo alle ku habboon macnaheeduna waa : sarreynta alle uu ka sara maray carshigiisa si xaqiiqa ah oo ku habboon weyninkisa iyo ka kaaftoonkiisa .

(T) –ka kor marida alle carshiga la mis maaha ka kor marida khalqiga , maxaa yeelay alle wuu ka kaaftoomaa carshiga umana baahno,khalqigase wax walb uu ka kor maro waa u baahanyahay.

waxaana u daliila aayaddan:

قال تعالى :

﴿ لَيْسَ كَمِثْلِهِۦ شَىْءٌ ۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ ﴿١١﴾ ﴾ [سورة الشورى، الآية: ١١].

Macnaha aayada waxaa waaye:"majiro wax isaga la mid ah,waana maqle arag badan "

(J) - In aan laga hadlin sida ow alle ugu dulmaray carshiga maxaa yeelay waa arrin aan ogaal loo leheyn alle maahane cidkalana ma oga.

(X) - Rumenta xukunka ka taratub mayo arrinkaas oo ah in loo sugo alle weynin iyo isla weynin ku haboon asiga,iyo quluubta oo u

jeesato asiga xaga sare, siduu dhahayaba qofka sujuudsan

(سبحا ربي الاعلى)

waxaa nasahan oo ka hufan rabigeygi sarreyay. SADEX / rumenta adoonka in uu alle yahay ilaahi xaqa ahaay,oo kaligii xaq ulahaay cibaadada oo dhan kuwa muuqda iyo kuwa qarsoon.

قال تعالى :

﴿ وَلَقَدۡ بَعَثۡنَا فِي كُلِّ أُمَّةٖ رَّسُولًا أَنِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱجۡتَنِبُواْ ٱلطَّٰغُوتَۖ ... ﴾ [سورة النحل، الآية: ٣٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:"waxaan soo saarnay umad walba dhexdeeda rasuul in alle ay caabudaan daaquutkana ka fogaadaan "
Mana jiro rasuul qoomkisa aan ku dhihin

قال تعالى :

﴿ ... ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنۡ إِلَٰهٍ غَيۡرُهُۥٓ ... ﴾ [سورة الأعراف، الآية: ٥٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:"caabuda alle malihidina ilaah aan asiga eheene "

قال تعالى :

﴿ وَمَآ أُمِرُوٓاْ إِلَّا لِيَعۡبُدُواْ ٱللَّهَ مُخۡلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ حُنَفَآءَ ...

﴾ [سورة البينة، الآية: ٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:" lama farin in ay caabudaan alle mooyaane,ayaga oo kali yeelaayo diinta , toosanna "

وفي الصحيحين أن النبي صلى الله عليه وسلم قال لمعاذ :( أتدري ما حق الله على العباد وما حق العباد على الله ؟. قلت : الله ورسوله اعلم .قال : حق الله على العباد ان يعبدوه ولا يشركوا به شيئا ، وحق العباد على الله ألا يعذب من لا يشرك به شيئا)

Waxaa ku soo arooray saxiixenka in uu nabiga ku yiri mucaad : mataqaan xaqa alle kuleyahay adoomanka iyo xaqa ay adoomanka ku leeyihiin alle ?waxan iri : alle iyo rasuulkiisa ayaa og. Markaa buu nabiga yiri : xaqa alle uu adomanka ku leeyahay waa in ay caabudaan waxna lawadaajin,xaqa adoomanka ay alle kuleeyihiina waa inuusan cadaabin ruux aan waxba la wadaajin ).

allaha xaqa ahna waa : kan ay quluubtu caabudo kana buuxiso jeceelkiisa jeceelkla asiga waxa kasoo haray,kagana kaaftoonto rajentiisa rajada cid kale, kagana deeqtoonto weydiintiisa iyo kaalmadiisa iyo cabsidiisa asiga cid aan eheyn.

قال تعالى :

﴿ ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ وَأَنَّ مَا يَدْعُونَ مِن دُونِهِۦ هُوَ ٱلْبَٰطِلُ وَأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْعَلِيُّ ٱلْكَبِيرُ ﴾ [سورة الحج، الآية: ٦٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:"kaasi waxaa ugu wacan in alle asiga xaq yahay , waxa ay caabudayaan sokodiisna baadil yahay , allana asigaa sareeye weyn ah "
Kaasna waa u kaliyeelka alle falalka adoomanka .

**Ahamiyada towxiidka :-**

Waxaa kuu cadeynayo ahamiyada towxiidka waxyaabaha soo socdo:-

(1) - Towxiidka waa waxa ugu horreeyo diinta uguna danbeeyo ahna diinta dusheeda iyo gudeheeda,waana waxey u yeereen rusushi alle uu soo diray -nabad gelyo dushooda ha ahaatee-.

(2) - Towxiidkaan dartiis ayuualle khalqiga u uumay rusushana u soo diray kutubtana u soo dejiyay , asiga dartiis ayay dadkana isku khilaafeen oy u qeebsameen kuwa rumeeyay iyo gaalo,kuwa liibaanay iyo kuwo halaagmay.

(3) - Waa waxa ugu horreyo oo waajib ku ah mukalafka(waa ruuxa qaangaarka ah cudur daarna leheyn sida waalli iyo wixi la mid ah)

waana waxa ugu horreyo uu kugelaayo adoon-ka islaamka iyo waxa ugu danbeeyo uu uga baxayo aduunka .

**Taxqiijinta Towxiidka :-**

taxqiijinta towxiidka waa: in laga saaro oo laga sifeeyo shirkiga oo dhan iyo bidaca iyo macaasida,taxqiijintaanna waa labo qeybood, mid waajiba iyo mid manduuba(waa wixi samentoodana ajir laga helaayo kategidoodana danbi aan laga qaadeyn)

Kan waajibka ah waxaa laga rabaa in laga helo seax arrimood :-

(A) -In laga sifeeyo shirkiga burinayana towxiidka asalkiisa .

(B) - In laga saaro wixi bidaco ah oo burinayo dhamestirka towxiidka,ama burinayo asalkiisa haday bidcadu tahay bidcado gaaleyneyso qofka.

(T) - In laga saaro macaasida iyo danbiyada dhimayo ajirka laga heli lahaa towxiidka, dhibna u geysaneyso.

Kan manduubka ahna waa kan la amray amar aan waajib eheyn waxaana tusaalo u ah waxa soo socdo:-

(A) – sugida dhamestirka darajada ixsaanka.(oo ah in aad u caabuid alle adigoo arkaya oo kale, hadaadan arkeynna asigaa ku

arkaya)
(B)-sugida dhamestirka dharajada yaqiinka(waana in aad si shaki la'ana u ogaato rabinimada iyo ilaahnimada alle kaliya).
(T) – sugida dhamestirka sabarka qurxoon oo ah in aadan u ashtakoon alle cid aan eheyn.
(J) –sugida dhamestirka ku kaaftoonka weydiinta alle,cid aan isaga eheynna waxba aadan weydiin.
(X)- Taxqiijinta darajada talasarashada oo ah kategida waxyaabaha qar oo banana sida : istirqaga iyo isgubida ugana tegtid talasarasho aad alle talo saaraneysid.
(KH)–dhamestirka darajada "المحبة التعبدية" jeceelka cibaadada oo ah in alle loogu dhawaado cibaadada naafilada ah oo waajibka aan eheyn.

Qofki u suga towxiidka sida la soosheegay kana nabadgalo shirkiga weyn waxuu kanabad geli in uu ku waaro naar, ruuxise kana badgalo shirkiga weyn iyo kan yar, kana fogaado danbiyada waaweyn iyo macaasida waxuu lee yahay nabadgelyo buuxdo aduun iyo aakhiro .

قال تعالى :

﴿ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغۡفِرُ أَن يُشۡرَكَ بِهِۦ وَيَغۡفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ لِمَن يَشَآءُۚ ... ﴾ [سورة النساء، الآية: ٤٨].

Macnaha aayada waxaa waaye: alle ma dhaafo in lala wadaajiyo cibaadada waxuusa ka dhaafaa wixi ka soo haro ruuxow doono "

قال تعالى :

﴿ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَلَمۡ يَلۡبِسُوٓاْ إِيمَٰنَهُم بِظُلۡمٍ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمُ ٱلۡأَمۡنُ وَهُم مُّهۡتَدُونَ ٨٢ ﴾ [سورة الأنعام، الآية:٨٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:"kuwii rumeeyay oon ku dheehin iimaankooda dulmi (shirki) kuwaas ayay nabadgelyo u sugantahay ayagaana hanuunsana "

Towxiidka waxaa kahorjeedo shirkiga,waana sadex qeebood :-

(A)-Shirki weyn oo burinaayo asalka towxidka.

illaheyna madhaafo in looga towba keeno maahane , qofka dhinto isagoon katowba keenin naarta ayuu ku waaraa , waxaa waayane in ow adoonka alle u yeelo kuwa kula mid ah cibaadada , una baryayo sida uu alle u baryayo una qasdayo,talo saaranayo , rajeynayo ama jeclaado ugana cabsado sida uu alle u jecelyahay ugana cabsado .

قال تعالى :

﴿ ... إِنَّهُۥ مَن يُشۡرِكۡ بِٱللَّهِ فَقَدۡ حَرَّمَ ٱللَّهُ عَلَيۡهِ ٱلۡجَنَّةَ وَمَأۡوَىٰهُ ٱلنَّارُۖ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنۡ أَنصَارٖ ﴿٧٢﴾ ﴾ [سورة المائدة، الآية:٧٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ruuxi alle u sharig yeela wuxuu ka xarrimay jannada , hoygiisana waa naarta , daalimiintana uma sugnaanin gargaarayaal "

(B)- shirki yar oo diidayo dhamestirnaanta towxiidka , waana wax walbo oo jid u ah shirkiga weyn , sida in lagu dhaarto alle waxaan eheyn , iyo wax yar oo istustus ah oo alle dartiis loo sameynin .

(T)- shirkiga qarsoon , waana kan ku xariirsan niyadaha iyo maqaasida , waxowna naqankaraa shirki weyn ama mid yar sida la soo dhaafay.

عن محمود بن لبيد رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال :( إن أخوف ما أخاف عليكم الشرك الاصغر ، قالوا : وما الشرك الاضغر ؟ قال : الرياء) رواه الإمام أحمد

Saxaabiga layiraahdo maxamud bin labiid waxuu nabiga ka wariayay In uu yiri: waxaan ugu cabsi badanahay oo aan idinkaga cabsanayo waa:shirkiga yar markaa bey wexey dheheen waa maxay shirkiga yar? Waxuu yiri : waa istuska .imaam axmad baa weriyay.

( 2) - CADEENTA CIBAADADA

Cibaadadu waa magac kulmiyo wax walbo uu alle jecelyahay raalina kayahay oo caqiidaa ama falalka qalbiga ama falalka xubnaha ama wax walba oo alle loogu dhawaanayo oo wax lafalayo ah ama wax laga reebtoomayo .

Waxaana soo hoos gelayo magaca cibaadada wax walba uu ku sharciyeeyay alle kitaabkiisa iyo sunnada rasuulkiisa muxamad waana cibaadooyin kala duwan , waxaa kamida qaar qalbiga la xariiro , sida arkaanta iimaanka oo lixda ah iyo cabsida iyo rajada iyo tala saarshada iyo rabida iyo wixi lamid ah , waxaa kale oo kamid ah cibaado muuqato sida : salaada iyo sakada iyo soonka iyo xajka .

Cibaadadana ma ansaxeyso hadii aan lagu salen laba arimood :-

(1)-In loo gaar yeelo cibadada alle cidnana lala wadaajin, kan macnihiisana waa qiritaanka alle maahane alle kale oo xaq algu caabudo in uusan jirin .

قال تعالى :

أَلَا لِلَّهِ ٱلدِّينُ ٱلۡخَالِصُۚ وَٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُواْ مِن دُونِهِۦٓ

أَوْلِيَآءَ مَا نَعْبُدُهُمْ إِلَّا لِيُقَرِّبُونَآ إِلَى ٱللَّهِ زُلْفَىٰٓ إِنَّ ٱللَّهَ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ فِي مَا هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِي مَنْ هُوَ كَٰذِبٌ كَفَّارٌ ﴿٣﴾ ﴾ [سورة الزمر، الآية:٣].

Macnaha aayada waxaa waaye:"war hoy alle ayuu u sugnaaday diinka khaaliska ah , kuwa kayeeshay sokadiisana owliyada dhahayana : uma caabudeyno in ay noo dhaweeyaan alle moyane dhawasho , allaana kala xukmin dadka waxey isku khilaafeen , allana ma hanuuniyo qof ah beenlow gaalnimo badan"

قال تعالى :

﴿ وَمَآ أُمِرُوٓاْ إِلَّا لِيَعْبُدُواْ ٱللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ حُنَفَآءَ ... ﴾ [سورة البينة، الآية:٥].

Macnaha aayada waa hor mary.

(2)-in la raaco waxa ow layimid rasuulka muxamad-naxariis alle iyo nabad dushiisa ha ahaatee- , oo ah in ow sameeyo adoonka waxa ow sameyay nabiga iyo wajiga ow u sameyay isagoon waxba ku daren waxna ka dhimeen , kana waa macnaha qiritaanka in ow muxamad rasuulki alle yahay .

قال تعالى :

﴿ قُلۡ إِن كُنتُمۡ تُحِبُّونَ ٱللَّهَ فَٱتَّبِعُونِي يُحۡبِبۡكُمُ ٱللَّهُ وَيَغۡفِرۡ لَكُمۡ ذُنُوبَكُمۡۚ ... ﴾ [سورة آل عمران، الآية:٣١].

Macnaha aayada waxaa waaye:"waxad ku dhahdaa hadaad jeceshihiin alle isoo raaca alleydin jeclaanayee , idiina dhaafaya dunuubtiinna "

قال تعالى :

﴿ ... وَمَآ ءَاتَىٰكُمُ ٱلرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَىٰكُمۡ عَنۡهُ فَٱنتَهُواْۚ ... ﴾ [سورة الحشر، الآية:٧].

Macnaha aayada waxaa waaye:" wuxuu idiinla yimid rasuulka qaata waxa uu idinka reebayna ka dhamaada "

قال تعالى:

﴿ فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤۡمِنُونَ حَتَّىٰ يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيۡنَهُمۡ ثُمَّ لَا يَجِدُواْ فِيٓ أَنفُسِهِمۡ حَرَجٗا مِّمَّا قَضَيۡتَ وَيُسَلِّمُواْ تَسۡلِيمٗا ٦٥ ﴾ [سورة النساء، الآية:٦٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:" rabigaa baan ku dhaarane ma rumeynayaan intey kaaga dhigaan xukun waxa dhex maro,ayna ka helaan naftooda dhib waxad xakuntay , ey hogaansanmaan hogaan "

Adoonnimada dhamestiranna waxey ku sugnaaneysaa laba arrimood :-

(KOOW)-jeceel alle oo dhameestiran,iyo jeceelka waxa uu jecelyahay,kaasoo laga hormarinayo jeceelka wax walba oo ka soo haray

(LABO)-si dhamestiran in leeskugu dulleeyo alle looguna jajabnaado,oo la fuliyo amarkiisa lagana fogaado waxuu reebay0.

Marka cibaadada waxey kulmisay jeceel dhamestiran iyo is jajabnaan iyo rajo iyo cabsi , sidaas ayayna ku sugnaaneysaa adoonimada uu u yahay adoonka rabigiis iyo uumihiisa , haduu adoonka layimaado adoonimadaas waxow gaarayaa jeceelka alle iyo raalinimadiisa, allena waxuu jecelyahay inuu adoonka ugu soo dhawaado waxa uu ku waajib yeelay oo faraaid ah, mar walbo uu adoonka badiyo cibaadada aan waajibka eheynna alle ayuu usii dhawaadaa kor ayayna u kacdaa darajadiisa.

arinkaasna waxow kamid yahay sababaha lagu galo jannada fadli iyo naxariis alle .

قال تعالى :

ا ٱدْعُوا۟ رَبَّكُمْ تَضَرُّعًا وَخُفْيَةً ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلْمُعْتَدِينَ

﴿ ﴾ [سورة الأعراف، الآية:٥٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:"u barya rabigiin si khushuuc ah iyo qarsoodi , asiga majeclo kuwa xad gudbay"

( 3 ) – **adillada kalinimada aalle**

Waxyaababaha marg u ah kalinimada alle wey badanyihiin, ruuxi u fiirsada oo maskaxdiisa ka shaqeysiiyana wuxuu si huban u ogaanayaa kalinimada raibiga,iyo u kalinimadiisa falalkiisa iyo magacdiisa iyo sifaadkiisa iyo ilaahnimadiisa .

Adiladaas iyo xujooyinkaas waxaa kamid ah tusaalo ahaan kuwa soo socda :-

(A)-weyninka koonkaan iyo wanaaga samentiisa iyo kala duwanaashaha uumkiisa , iyo nidaamka aadka u sugan ow ku socdo , ruux walba oo arinkaa u fiirsadana waxow ugaadaa kalinamada alle , kan u fiirsanaya abuuritaanka samooyinka iyo dhulka iyo abuurka qoraxda iyo dayaxa iyo abuurka dadka iyo xayawaanka iyo abuurka dhirta iyo jamaadka waxow ogaanayaa si huban in uunkaan ow leeyahay mid abuuray oo u dhamestiran magacdiisa iyo sifaadkiisa iyo ilaahnimadiisa taasna wexey ku tusee in uu kaligii cibaadada mudanyahay .

قال تعالى :

﴿ وَجَعَلْنَا فِي ٱلْأَرْضِ رَوَٰسِيَ أَن تَمِيدَ بِهِمْ وَجَعَلْنَا فِيهَا فِجَاجًا سُبُلًا لَّعَلَّهُمْ يَهْتَدُونَ ۝٣١ وَجَعَلْنَا ٱلسَّمَآءَ سَقْفًا مَّحْفُوظًا ۖ وَهُمْ عَنْ ءَايَٰتِهَا مُعْرِضُونَ ۝٣٢ وَهُوَ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ ۖ كُلٌّ فِى فَلَكٍ يَسْبَحُونَ ۝٣٣ ﴾ [سورة الأنبياء، الآيات: ٣١-٣٣].

Macnaha aayada waxaa waaye:"waxaan kayeelnay dhulka sugayaal inayna la liican dadka,waxaana kayeelnay dhexdeeda(buuraha) wadooyin,waxeyna mudan yihiin in ay ku toosaan,waxaan kayeelnay samada saqaf (dabool)ilaalsan ayagna calaamooyinkeeda ayay ka jeesanayan, alle waa kan aburay habeenka iyo maalinta iyo qorraxda iyo dayaxa , mid kastana falag(wareeg) ayuu dhex dabaashaa "

قال تعالى :

﴿ وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦ خَلْقُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَٱخْتِلَٰفُ أَلْسِنَتِكُمْ وَأَلْوَٰنِكُمْ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّلْعَٰلِمِينَ ۝٢٢ ﴾ [سورة الروم، الآية: ٢٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:" aayadahisa waxaa kamid ah abuurka samooyinka iyo

dhulka iyo kala duwanaashaha carabyadiina iyo medebbadiina , taasina calaamad ayaa ugu sugan kuwa cilmiga leh"

(B)-Waxow alle kusoo saaray rususha oo ah sharciyada iyo waxa ow ku xoojiyay oo ah aayado iyo calaamaad iyo mucjisooyin iyo xujooyin kuwaas oo kutusayo kalinimada alle iyo in uu cibaadada kali u yahay , waxa allena u sharciyeeyay khalqigiisa oo axkaan ah waxa waye daliil cad oo ku tusayo in uusan arrinkaas sameykarin mid aan rabbi eheyn, aadna u xeeldheer,cilmi badanna u leh khalqigiisa iyo waxa u wanaagsan .

قال تعالى ":

﴿ لَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا بِالْبَيِّنَاتِ وَأَنزَلْنَا مَعَهُمُ الْكِتَابَ وَالْمِيزَانَ لِيَقُومَ النَّاسُ بِالْقِسْطِ ... ﴾ [سورة الحديد، الآية:٢٥]

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxaan dhab ahaan ku dirny rususheyna aayado cad cad , waxaana lasoo dejinay kitaabka iyo miisaanka si dadka ugu toosaan cadaalad "

قال تعالى :

﴿ قُل لَّئِنِ اجْتَمَعَتِ الْإِنسُ وَالْجِنُّ عَلَىٰ أَن يَأْتُوا بِمِثْلِ هَٰذَا الْقُرْآنِ لَا يَأْتُونَ بِمِثْلِهِ وَلَوْ كَانَ بَعْضُهُمْ لِبَعْضٍ ظَهِيرًا

﴾ ﴿ [سورة الإسراء، الآية:٨٨].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ku dheh haday u kulmaan insiga iyo jinniga in ay layimaadadaan mid la mid ah quraankaan , lama imaanayaan mid la mid ah , haday ahaadaan qaarkod kuwa u gargaara qaarka kale "

(T)- waxaa kale oo daliil ah fidrada uu alle ku abuuray qalbiyada adoomanka,taasoo ah qiritaanka kalinimada alle , waana amar kusugan nafta , hadii uu insaanku dareemo dhib wuxuu helaa arinkaas iyo fidradaas alle ayuuna u soo noqdaa , hadow insaanku kabadbaado shubuhaadka iyo shahawaadaka bedelaysa fidradiisa kama heleen gudaha naftiisa in ow qiro ogolaadana u kalinimada alle ilaahnimada iyo magacdiisa iyo sifaadkisa iyo falalkiisa iyo in ow ogolaado iskuna dhiibo sharcigiisa ow ku soo saaray rusushiisa -naxariis iyo nabadgelyo alle dushooda ha yeelee- arrinkaas mooyaane wax kale kama heleen gudaha naftiisa .

قال تعالى :

﴿ فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا ۚ فِطْرَتَ ٱللَّهِ ٱلَّتِى فَطَرَ ٱلنَّاسَ عَلَيْهَا ۚ لَا تَبْدِيلَ لِخَلْقِ ٱللَّهِ ۚ ذَٰلِكَ ٱلدِّينُ ٱلْقَيِّمُ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ

لَا يَعْلَمُونَ ۝٣٠ ۞ مُنِيبِينَ إِلَيْهِ وَٱتَّقُوهُ وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَلَا تَكُونُوا۟ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ۝٣١ ﴾

[سورة الروم، الآيتان: ٣٠ ، ٣١].

Macnaha aayada waxaa waaye:"u jeedi wejigaada diinta adiga oo toosan,diintu waa fidradi alle ku dul abuuray dadka , lama bedeli karo uumida alle , kaasina waa diinka toosan, laakiin badida dadka ma ogo,ayagoo usoo noqonayo alle kana dhorsada , oogana salaadda , hana kamid naqanina gaalada "

وقال صلى الله عليه وسلم : ( كل مولود يولد على الفطرة فأبواه يهودانه أو ينصرانه أويمجسانه ، كما تنتج البهيمة بهيمة جمعاء هل تحسون فيها من جدعاء ، ثم قرأ " فطرت الله التي فطر الناس عليها " رواه البخاري.

Macnaha xadiiskana waxa waaye :ruux walbo oo la dhalo waxaa lagu dhalaa fidrada (islaamka),labadiisa waalid ayaana yahuudi kadhigayo ama nasraani ama majuus, sida ow neefkuba u dhalo neef kale oo dhamestiran maka dareemeysaan dhinac(sida gees iyo dheg) ka goan , markaa buu kadib akhriyay:

"فطرت الله التي فطر الناس عليها"

Bukhaari ayaana weriayay.

# *Rukniga labaad*
# *Rumenta malaikTa*

**(KOW) CADEENTIISA:**

rumeenta malaaikta waa : in la ictiqaado si goan in ow alle leeyahay malaaik ow ka abuuray iftiin,waxaana loo abuuray cibaadada alle,mana caasiyaan waxa uu amray , wayna sameeyaan waxa la faray, ilaahay bey nasahaan habeen iyo maailn kamana daalaan , tiradoodana magaraneyso alle maahane cid kale , waxuuna ku kalifay alle falal iyo shaqoyin kala duduwan .

قال تعالى :

﴿ ... وَلَٰكِنَّ ٱلۡبِرَّ مَنۡ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةِ ... ﴾ [سورة البقرة، الآية:١٧٧].

Macnaha aayada waa soo shegnay.

قال تعالى :

﴿ ... كُلٌّ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَمَلَٰٓئِكَتِهِۦ وَكُتُبِهِۦ وَرُسُلِهِۦ لَا نُفَرِّقُ

بَيۡنَ أَحَدٖ مِّن رُّسُلِهِۦۚ ... ﴾ [سورة البقرة، الآية:٢٨٥].

Macnaha aayada waan soo sheegnay.

وفي حديث جبريل المشهور لما سأل رسول الله صلى الله عليه وسلم عن الإسلام والإيمان والإحسان . قال –أي جبريل – : فأخبرني عن الإيمان . قال– أي رسول الله صلى الله عليه وسلم – أن تؤمن بالله وملائكته وكتبه ورسله واليوم الأخر وأن تؤمن بالقدر خيره وشره.

Xadiithki jibriil oo caanka ahaay waxaa ku sugnaaday markuuu jibriil weydiiyaya nabiga –naxariis alle iyo nabad dushiisa ha ahaatee- : iimaanka, wuxuu yiri nabiga : waa in aad rumeysid alle ,malaaiktiisa ,kutubtiisa ,rasuuladiisa,maalinta danbe ,iy in aad rumeysid qadarka kheyrkisa iyo shartiisa .

**darajada ay rumenta malaikta diinyta ku leedahay iyo xukunkeeda :**

Rumenta malaaikta waa rukniga labaad ee arkaanta iimaanka oo lixda ah , iimaanka adoonkana ma ansaxmayo lamina aqbalayoruknigaa la aantiis.

**Xukunkiisa:**

Waxay isku raaceen muslimiinta in rumeenta malaaikta waajib tahay, ruuxi inkira jiritaankooda, ama kuwa kamid ah kuwa uu alle sheegay waa gaaloobay, waxowna khilaafay kitaabka iyo sunnada .

قال تعالى :

ا ... وَمَن يَكْفُرْ بِٱللَّهِ وَمَلَٰٓئِكَتِهِۦ وَكُتُبِهِۦ وَرُسُلِهِۦ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَٰلًۢا بَعِيدًا ﴿١٣٦﴾ [سورة النساء، الآية:١٣٦].

Macnaha aayadana waan soo sheegnay

**(LABO)-keyfiyada(sida)loo rumeynayo malaaikta :**

Rumenta malaikta waxay u kalaqeybsantaa mid kooban iyo mid faahfaahsan:

(1)-rumeynta sida kooban ah waxaa soo hoosgelayo arrimaha soosocdo:

a- in laqiro jiritaankooda , yihiinna abuur kamid ah abuurka alle , waxuuna alle u abuuray cibaadadiisa , jiritaankoodana waa mid dhab ah , inaan arkeyninna kuma tuseyso in aysan jirin , waxaana cadeynayo arinkaas waxa yar yar oo ka buuxo koonkaan hadana aanan arkeynin.

waxaana xaqiiqa ah nabiga inuu arkay jibril asigoo sidi loo abuuray ah lba mar , asxaabta qaarkoodna waxey arkeen malaaikta qaarkeed ayagoo dad isku ekeysiiyay .

فقد روى الإمام أحمد في المسند عن عبد الله بن مسعود رضي الله عنه قال: رأى رسول الله صلى الله عليه وسلم جبريل في صورته وله ستمائة جناح ، وكل جناح منها ق سد الأفق ))

وقد ثبت في الحديث جبريل المشهور والذي رواه مسلم أن جبريل عليه السلام جاء بصورة رجل شديد بياض الثياب شديد سواد الشعر لا يرى عليه اثر السفر ولا يعرفه أحد من الصحابة

Waxow ku wariayay immu axmad musnadkisa in ow cabdulaahi ibnu mascuud yiri : waxow arkay rasuulka jibriil asigoo sidi alle u uumay ah lehna lix boqol oo baal , baal walba oo kamid ahna cirka deday

Waxaa kale oo kusugnaaday xadiithki jibriil oo caanka ahaay oo muslim wariyay in ow jibriil kuyimid(isku ekeysiiyay) sawirka nin aad u dhar cad aadna u tima madow dushiisana ayna ka muuqanin raad safar sida boor iyo wax lamid ah,garaneyna ruux saxaabada ka mida .

(2)-in la siiyo darajadi uu alle siiyay, oo ah in ay yihiin adoomo alle, oo la amran , karaameyay , maqaamkoodana kor u qaaday u dhaweeyayna xagiisa , waxaana kamid ah qaar rusushi alle waxyiga u soo dhiibay ah iyo qaar kale , mana awoodaan waxa ow ale awoodsiiyay maahane, iyaga oo saas ah hadana uma awoodaan naftooda iyo qeerkoodba wan-aag iyo dhib ilaahey sokadiis , sidaas darted ma bannaano in la caabudo habayaraato cibaadadaase , iskaba dhaaf in lagu tilmaamo tilmaamo rabbinimo siday ku andacootay oo

kale nasaaradi nabi ciise -nabad gelyo dushiisa ha ahaatee-.

قال تعالى :

﴿ وَقَالُواْ ٱتَّخَذَ ٱلرَّحْمَٰنُ وَلَدًاۗ سُبْحَٰنَهُۥۚ بَلْ عِبَادٌ مُّكْرَمُونَ ۝٢٦ لَا يَسْبِقُونَهُۥ بِٱلْقَوْلِ وَهُم بِأَمْرِهِۦ يَعْمَلُونَ ۝٢٧ ﴾ [سورة الأنبياء، الآيتان:٢٦ ، ٢٧].

Macnaha aayada waxaa waaye:"wexey dheheen wuxuu yeeshay raxmaanki ilmo , waa ka nasahanyahay , waase adooman la sharfay "

﴿ ... لَّا يَعْصُونَ ٱللَّهَ مَآ أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ ۝٦ ﴾

[سورة التحريم، الآية:٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:" macaasi nayaan waxa uu alle amray , waxeyna sameynayaan wixi la faray "

intaan yar oo iimankaa waxay waajib ku tahay ruux walba oo muslim ah, waxaana waajib ah rumeentiisa,barashadiisa,loogumana cudur daari maayo qofna garasho la‘ aanteeda.

Imaanka mufasalka ah (faah faahsan ) waxaa sooo hoos gelayo arrimaha soo socoda:-

(1)-Maadada laga abuuray malaaikta:

alle waxuu ka abuuray malaaikta iftiin sida uu uga abuuray jiniga dab, bini aadankana dhoob ,

abuuruitaanka malaaiktana waxow ahaay kahor inta aan la aburin aadan-nabad gelyo dushisa ha ahaatee-.

وقد جاء في الحديث " خلقت الملائكة من نور ، وخلق الجان من مارج من نار ، وخلق آدم مما وصف لكم " رواه مسلم .

Waxaa ku yimid xadiithka:waxaa laga abuuray malaikta iftiin , jinnigana oloka naarta , aadana waxa laga abuuray waxa leydiin tilmaamay".

(2)-tirada malaaikta :

malaaikta waa uun owna koobi Karin tiradooda alle maahane ruux kale, samadana kuma taal meel afar farood u dhiganto illaa uu dul yahay malak sujud san ama istaagsan maahane, sidoo kale guriga lyiraahdo baytl macmuur(gurigi camiran) oo ku yaal samada todobaad waxaa galo maalin walba todobo kun oo malak , kuna soo naqamaayo mar danbe tiro darteed,maalinta qiyaamana waxaa lakeenaa naarta iyadoo leh todoba kun oo hogaan , hogaan walbana waxaa jidayo todobaatan kun oo malak .

قال تعالى :

ا ... وَمَا يَعْلَمُ جُنُودَ رَبِّكَ إِلَّا هُوَ... ﴾ [سورة المدثر، الآية:٣١].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ma ogo askarta rabigaa asiga maahane cid kale "

وجاء في الحديث أنه صلى الله عليه وسلم قال : (( أطَت السماء وحق لها أن تئط ، ما فيها موضع قدم إلا وفيه ملك ساجد وراكع))

Waxaa xadiis ku soo arooray in ow nabiga yiri : ( samadin ayaa hadashay(buuxid ay buuxdo darteed) xaq ayay u eedahay in ay qeylido , meel lug la dhigo kuma taal illaa mahane ow malak sujuud sanyahay ama rukuc sanyahay .

وقال صلى الله عليه وسلم عن البيت المعمور :( يدخله في كل يوم سبعون الف ملك لا يعودون إليه ) رواه البخاري ومسلم

Nabigana wuxuu yiri asiga oo ka waramaya beytulmacmuurka:waxaa gelayo maalin walbatodobaatan kun oo malak dibna ugu soo noqon maayaan .bukhaari iyo muslim ayaa weriayay .

وقال صلى الله عليه وسلم: ( يؤتى بجهنم يومئذ لها سبعون الف زمام ، مع كل زمام سبعون ألف ملك ) رواه مسلم

Waxaa kale uu sheegay nabiga : in lakeeni dono jahannamo maalinta qiyaamo iyadoo leh todobaatan kun oo hogaan , hogaan walbana ay todobaatan kun oo malak lajoogto .

Halkaanna waxaa nooga cadaday badida malaaikta,kuwaaas aan soo dhaafnay-tusaalo ahaan- waxey gaarayaan afarkun iyo sagaal boqoloo malyan oo malyan.
waxaana nazahan oo ka hufan ceeb walba allihi uumay koobayna tiradooda .
(3)- magacda malaaikta :
waxaa waajib ah rumenta kuwa ow alle noogu magacaabay quraanka, ama ow nogu magacaabay rasuulkiisa sunnada oo malaikta ah , kuwa ugu waweyna waa sedax:
(koow)-jibriil, ama jabraaiil , waana ruuxul quduska ku soo dejiyo rasuulada alle waxyiga ah nolosha qalbiga.
(Labo)- miikaaiil , ama miikaal , ahna kan loo wakiishay roobka ah nolosha dhulka waxuuna u hogaamiyaa halki alle amro .
(Sadex)- israfiil , waxuuna wakiil kayahay afuufka boonka isagoo ogeysiinayo in ay dhamaatay noloshi aduunyo bilaabatayna noloshi aakhiro ……
(4)- tilmaanta malaaikta :
malaaiktu waa abuur jiro oo xaqiiqa ah , wexey leeyihiin jirar xaqiiqa ah , iyo sifooyin akhlaaqda ah iyo sida loo abuuray, waxaana ka mid ah sifaadkaas :

(A)-**Weyninka abuurkooda , iyo weyninka jirkooda :**

alle waxuu abuuray malaaikta ayagoo jirar waa weyn oo adag leh , oo ku haboon falalka waa weyn uu alle uga wakiishay samooyinka iyo dhulka .

(B)Wexey leeyihiin baalal : waxuu u abuuray alle malaaikt baalal labo labo iyo sadex sadex iyo afar afar,iyo kabadan, sida uu u arkayba rasuulka jibriil asigoo sidi loo abuuray ah oo leh lix boqol oo baal , oo cirka dhan xiray .

قال تعالى :

﴿ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ فَاطِرِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ جَاعِلِ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ رُسُلًا أُو۟لِىٓ أَجْنِحَةٍ مَّثْنَىٰ وَثُلَٰثَ وَرُبَٰعَ ۚ يَزِيدُ فِى ٱلْخَلْقِ مَا يَشَآءُ ۚ ... ﴾ [سورة فاطر، الآية:١].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxaa mahad leh allihi uumay samooyinka iyo dhulka kayeelayna malaaikta rusul leh baalal labo labo iyo sadex sadex iyo afar afar , wuuna ku siyaadiyaa khalqiga wuxuu doono wax walbana alle wa awoodaa "

(T)- malaaikta uma baahno cunno iyo cabitaan oo allaa abuuray aygoo u baaheyn cunno iyo cabitaan mana guursadaan mana bataan.

(j)-malaaiktu caqli bey leeyihiin iyo qalbi, ilaahey bey lahadleen allena wuu la hadalyay, aadaam bey lahadleen iyo anbiyada kale .
(x)- waxey awoodaan in ay isku ekeysiiyaan sawir an koodi dhabta eheyn: alle waxow siiyay malaaikta awood ay isugu ekeysiin karaan kuwa labka ah oo dadka ka tirsan, arinkaanna waxuu burinayaa waxa ey wathaniyiinta ku andacoodeen oo ah in ey malaaiktu tahay gabdhihi alle .

mana ogin sida ay isugu ekeensiinayaan malaaiktu dadka laakiin waxaa jirta in ay si aad ugu eg isugu ekeysiiyaan, oo lakala saari kareen iyaga iyo dadka ay isku ekeysiinayaan.
(d)-dhimashada malaaikta : malaaikta wey dhimanayaan dhamaantood maalinta qiyaamo xataa malaga dhimashada, kadib baa hadana lasoo saarayaa si ay u qabtaan falalki alle u wakiishay .
(r)- cibaadada malaaikta : malaaiktu waxey ku caabudaan alle, cibadooyin ey kamid tahay : salaad , duco , tasbiixsi, rukuuc , sujuud , cabsi , jeceel , iyo kuwa kale .
tilmaanta ay cibaadadooda leedahay waxaa ka mid ah :
(1)-joogto aan daal leheen .
(2)-u kali yelid alle .

(3)-daacad alle oo joogto ah, iyo macsida oo laga fogado,alle ayaana ka ilaaliyay danbiyada
(4)- cibaado badan iyo alle oo lesku dulleeyo

قال تعالى :

﴿ يُسَبِّحُونَ ٱلَّيۡلَ وَٱلنَّهَارَ لَا يَفۡتُرُونَ ﴿٢٠﴾ ﴾ [سورة الأنبياء، الآية:٢٠].

Macnaha aayada waxaa waaye:"waxey tasbiixsanayaan hlinta , ma daalayaan "
( 5 )-acmaasha malaaikta ay qabato :
waxey qabtaan malaaikta acmaal waaweyn oo ilaahey u wakiishay , waxaana kamid ah acmaashaas:
(1)-xinbaarida carshiga .
(2)-malaga loo wakiishay ku soo dejinta waxyiga rususha .
(3)- ilaalinta jannada iyo naarta .
(4)-kuwa lo wakiishay daruurta iyo roobka iyo dhirta .
(5)- kuwa loo wakiishay buuraha .
(6)- malaga loo wakiishay afuufida boonka .
(7)- kuwa loo wakiishay qorida acmaasha bani adanka .
(8)- kuwa loo wakiishay ilaalinta bani adanka , hadii alle amar qadarana waxuu qadaro baa dhaco.
(9)- kuwa loo wakiishay inay lajoogaan bani

aadanka kheyrkana ugu yeeraan.
(10)- kuwa loo wakiishay biyaha gelayo raximka,iyo in ay insaanka ku afuufaan ruuxda, iyo qoritaanka risiqiisa iyo camalkiisa iyo in ow yahay mid hoogayo ama mid liibaanayo.
(11)- kuwa loo wakiishay in ay nafta kaqaadaan bani adanka markuu dhimanayo.
(12)- kuwa loo wakiishay in ay ku weydiiyaan dadka qubuurta dhexdeeda,iyo iyo waxa ka taratubmayo oo ah nicmo ama cadaab.
(13)- kuwa loo wakiishay in ay gaarsiiyaan nabiga salaanta umadiisa.
Sidaas darteedna uma baahno ruuxa muslimka ah in uu safar u galo si uu u salaamo nabiga -naxariis alle iyo nabad dushiisa ha ahaatee- , waxaana arinkaa uga filan in uu uga weydiiyo alle meel walba uu joogo naxariis iyo nabad, malaaikta ayaana soo qaadeyso salantiisa gaarsiinna nabiga, waxaa uun loosoo safar tagaa masaajidka nabiga si loogu dukado.
Malaaiktana falal kale oo badan ayay leeyihiin kuwa aan sheegnay ayaa ugu caansan , waxaana daliil u ah arinkaas :-

قال تعالى :

﴿ ٱلَّذِينَ يَحۡمِلُونَ ٱلۡعَرۡشَ وَمَنۡ حَوۡلَهُۥ يُسَبِّحُونَ بِحَمۡدِ رَبِّهِمۡ وَيُؤۡمِنُونَ بِهِۦ وَيَسۡتَغۡفِرُونَ لِلَّذِينَ ءَامَنُواْ ... ﴾ [سورة غافر، الآية:٧].

Macnaha aayada waxaa waaye:"kuwa xinbaarsan carshiga iyo waxa hareerihiisa ah, waxey ku nasahayaan mahada rabigood,weyna rumeynayaan,waxeyna u danbi dhaafayaan kuwa rumeeyay "

قال تعالى :

﴿ قُلۡ مَن كَانَ عَدُوًّا لِّجِبۡرِيلَ فَإِنَّهُۥ نَزَّلَهُۥ عَلَىٰ قَلۡبِكَ بِإِذۡنِ ٱللَّهِ ... ﴾ [سورة البقرة، الآية:٩٧].

Macnaha aayada waxaa waaye:"ku dheh qofki ahaa cadawga jibriil asiga ayaa qalbigaada ku soo dejiyay waxyiga idan alle"

قال تعالى :

﴿... وَلَوۡ تَرَىٰٓ إِذِ ٱلظَّٰلِمُونَ فِي غَمَرَٰتِ ٱلۡمَوۡتِ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ بَاسِطُوٓاْ أَيۡدِيهِمۡ أَخۡرِجُوٓاْ أَنفُسَكُمُۖ... ﴾ [سورة الأنعام، الآية:٩٣].

Macnaha aayada waxaa waaye:" hadaad arki leheed waqti ay dalimiinta ku suganyihiin sakaraatka dhimasha , malaaiktuna taageyso gacmaheeda : soo saara naftiina "

( 6 ) -xuquuqda ey malaikta ku leeyihiin bani adanka :

(a)- rumentooda .
(b)-jecelkooda iyo weynoontooda , iyo xusida fadligooda .
(t)-reebida caydooda, ama wax ceeb ah loo tiiriyo ama lagu jeesjeeso.
(j)- in laga fogaado waxa ey necebyihiin,nabiguna wuxuu sheegay in ay ka dhibtonayaan waxa bani aadanka ka dhibtoonayo.

Miraha laga helayo rumenta malaaikta :

(1)-taxqiijinta imaanka , oo iimaanka ma ansaxayo illaa ayaga laga rumeeyo .
(2)-in la ogaado weyninka allihi abuuray iyo awoodiisa iyo xukunkiisa,weyninka abuurkana wexuu kutusayaa weyninka abuuraha ..
(3)-iimaanka ku kordhayo qalbiga muslimka markuu ogaado tilmaamaha malaaikta iyo axwashooda iyo shaqadooda .
(4)-nabad iyo xasillooni ay helayan mumininta markuu alle kusugayo malaaikta .
(5)- malaaikta oo la jeclaado wexey sameeyeen darteed oo cibaadaad ah,iyo danbi dhaafka ay u u weydiiyaan muminiinta.
(6)-naceebka falalka xun iyo macaasida .
(7)- alle in loogu mahdiyo daryeelka uu daryeelay adoomankiisa , kan yeelay malaaikta qaarked kuwa ilaaliyo adoomanka qorana

acmaashooda , iyo waxyaaba kale oo danahooda ah .

## *Rukniga sedaxaad*
## *Rumeenta kutubta*

Rumeenta kutubta alle kusoodejiyay rusushiisa -naxariis iyo nabad dushoda ha ahaatee- waa rukniga sadexaad ee arkaanta iimaanka.

allena rusul ayuu ku soo diray aayada cad cad kutubna waa kusoo dejiyay,naxaris uu u naxariisanayo khalqiga hanuun owgeed, si ay u helaan libaan aduunyo iyo mid aakhiro , una ahaato jid ay ku socdaan, iyo si ow u noqdo mid u kala xakmiyo dadka waxa ay isku

khilaafaan .

قال تعالى :

﴿ لَقَدۡ أَرۡسَلۡنَا رُسُلَنَا بِٱلۡبَيِّنَٰتِ وَأَنزَلۡنَا مَعَهُمُ ٱلۡكِتَٰبَ وَٱلۡمِيزَانَ لِيَقُومَ ٱلنَّاسُ بِٱلۡقِسۡطِۖ ... ﴾ [سورة الحديد، الآية:٢٥].

Macnaha aayadana waa lasoo maray.

قال تعالى :

﴿ كَانَ ٱلنَّاسُ أُمَّةً وَٰحِدَةً فَبَعَثَ ٱللَّهُ ٱلنَّبِيِّـۧنَ مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ وَأَنزَلَ مَعَهُمُ ٱلۡكِتَٰبَ بِٱلۡحَقِّ لِيَحۡكُمَ بَيۡنَ ٱلنَّاسِ فِيمَا ٱخۡتَلَفُواْ فِيهِۚ ﴾ [سورة البقرة، الآية:٢١٣].

Macnaha aayada waxaa waaye:" dadka wexey ahaayeen umad kaliya allaana soo saaray nabiyo bishaareeyo digana, wuxuuna la soo dejiyay kitaabka xaq ahaan, si uu u kala xukmiyo dadka dhexdoda wexey isku khilaafaan"

**(1)- xaqiiqada rumeenta kutubta :**

rumenta ktubta waa: in aad si goan u rumayso in alle ow leeyahay kutub uu ku soo dejiyay rusushiisa , waana hadalkisi oo dhab ah , waana nuur iyo hanuun , waxey ka koobantahayna waa xaq iyo run iyo cadaalad waajib ah in laraaco laguna camalfalo , mana garanayo cadadkooda alle moyaane ruux kale .

قال تعالى :

﴿ ...وَكَلَّمَ ٱللَّهُ مُوسَىٰ تَكۡلِيمًا ﴿١٦٤﴾ ﴾ [سورة النساء، الآية:١٦٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxuu la hadlay alle muuse la hadal"

قال تعالى :

﴿ وَإِنۡ أَحَدٞ مِّنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ ٱسۡتَجَارَكَ فَأَجِرۡهُ حَتَّىٰ يَسۡمَعَ كَلَٰمَ ٱللَّهِ ... ﴾ [سورة التوبة، الآية:٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:"hadii ruux mushrikiinta ka tirsn uu ku megan galyo weydiisto,megangelyeey si uu u maqlo hadalka alle "

**(2)- Xukunka rumeenta kutubta :**

Waxaa waajib ah rumeenta dhamaan kutubta alle rusushiisa ku soo dejiyay,allena-barakoobay oo sareeyee- asiga ayaa si dhab ah ugu hadlay , waana lasoo dejiyay ee lama abuurin , qofki inkirana asiga oo og ama inkira qaar ka mid ah waa gaaloobay .

قال تعالى :

﴿ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ ءَامِنُواْ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَٱلۡكِتَٰبِ ٱلَّذِي نَزَّلَ عَلَىٰ رَسُولِهِۦ وَٱلۡكِتَٰبِ ٱلَّذِيٓ أَنزَلَ مِن قَبۡلُۚ وَمَن يَكۡفُرۡ بِٱللَّهِ

وَمَلَٰٓئِكَتِهِۦ وَكُتُبِهِۦ وَرُسُلِهِۦ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِ فَقَدۡ ضَلَّ ضَلَٰلَۢا

بَعِيدًا ﴿١٣٦﴾ ﴾ [سورة النساء، الآية:١٣٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:" kuwi rumeeyow rumeeya alle iyo rasuulkisa iyo kitaabka uu ku soo dejiyay rasuulkiisa iyo kitaabki uu soo dejiyay ka hor , ruuxi ku gaaloobo alle iyo malaaiktiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo maalinta aakhiro waa baadiyobay baadi fog"

قال تعالى :

ا وَهَٰذَا كِتَٰبٌ أَنزَلۡنَٰهُ مُبَارَكٞ فَٱتَّبِعُوهُ وَٱتَّقُواْ لَعَلَّكُمۡ

وقال صلى الله عليه وسلم :" ثم ينفخ في الصور فلا يسمع أحد إلا أصغى ليتا ورفع ليتا ، ثم لايبقى احد إلا صعق ، ثم نزل الله مطرا كأنه الطلل ، فتنبت منه أجساد الناس ، ثم ينفخ فيه أخرى فإذا هم قيام ينظرون" رواه مسلم .

Nabiga wuxuu yiri: "...kedib waxaa la afuufyaa boonka , mana maqalayo ruux illaa uu daanna ku dhegeestay daanna kor u qaaday , dabadeedna ma haryo ruux aanan suuxin , kadibna alle baa roob soo dejinayo khafiif ah , jirka dadka ayaana ka soo dhalanayo , kedib baa hadana afuufki labaad la afuufayaa, waaba

ayagoo istaagsan oo ku soo eegayo.
(Afar) - soosaridda:
soosaaridu waa nooleynta alle uu nooleynayo meetka marki la afuufo boonka afuufka labaad , oy dadkana u istaagaan rabiga caalamiinta , kana baxayaan qubuurtooda iyaga oo u deg degaya halki la istaagi lahaa,iyagoo kaba l‘a ,qaawan , baajo qab ah , waxba cadeyn kareen , waxna wadan.

Istaaguna waa dheeraanayaa qoraxdana way soo dhawaan,kuleelkana waa kordhayaa, dhidid ayaana liqi doono adka, dadka qaar qoobka ayuu u gaari, qaarna jilbaha , qaarna dhexda , qaarna naasaha, qaarna garbaha,qaarna wuu qarin doonaa , qof walbana camalkiisa ayay ku xirantahay.

Soo saariduna waa xaq ku sugan, daliilna waxaa u ah: sharciga iyo dareenka iyo caqliga :
(1)-sharciga : aayada badan iyo axaadiith saxiix ah ayaa sheegaya in uu sugan yahay .

قال تعالى :

ا ... قُلۡ بَلَىٰ وَرَبِّى لَتُبۡعَثُنَّ... ﴾ [سورة التغابن، الآية:٧].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ku dheh waaba sidaase waxaan ku dhaaratay rabigeeye waa leydin soo saari "

قال تعالى :

﴿ كَمَا بَدَأْنَآ أَوَّلَ خَلْقٍ نُّعِيدُهُۥ ...﴾ [سورة الأنبياء، الآية:١٠٤].

Macnaha aayada waxaa waaye:" sidaan u billawnay kii ugu horeeyay abuurka ayaan u soo celineynaa "

وقال صلى الله عليه وسلم:"ثم ينفخ في الصور فلا يسمع أحد إلا أصغى ليتا ورفع ليتا،ثم لايبقى احد إلا صعق،ثم نزل الله مطرا كأنه الطلل، فتنبت منه أجساد الناس،ثم ينفخ فيه أخرى فإذا هم قيام ينظرون"رواه مسلم .

قال تعالى :

﴿ ...قَالَ مَن يُحْيِ ٱلْعِظَٰمَ وَهِىَ رَمِيمٌ ﴿٧٨﴾ قُلْ يُحْيِيهَا ٱلَّذِىٓ أَنشَأَهَآ أَوَّلَ مَرَّةٍ ۖ وَهُوَ بِكُلِّ خَلْقٍ عَلِيمٌ ﴿٧٩﴾ ﴾ [سورة يس، الآيتان:٧٨ ، ٧٩].

Allena wuxuu yiri isagoo noo sheegayogaaladi waxa ay dheheen:" waxuu yiri kee nooleyneyo lafaha iyagoo dhamaaday? , ku dheh waxaa nooleyhaa kii abuuray marki ugu horreeyday, asigaana abuur walba ogaal badan u leh "

( 2-)dareenka: waxaa xaqiiqa ah inuu alle ku tusay adoomankiisa aduunka nooleynta metka, surada al baqarana shan tusalo ayuu allekusheegay wexeyna kala yihiin:qomki muuse uu alle nooleeyay kadib markuu

dhinsiiyay,ninki rer banii israail ay dileen kadibna alle noolaysiiyay,kuwii ka bexeen guryahooda carar ey ka cararayaan dhimasho ee alle yiri dhinta kadibna nooleeyay, kii maray toolada oo yiri siduu alle u nooleynaya ee alle dhinsiiyay kadibna nooleeyay,iyo shinbirti nabi ibraahin ee alle dilay kadibna nooleeyay.

( 3)-caqligana,laba dhinac ayuu daliil uga yahay:

(a)- alle waa kii abuuray samooyinka iyo dhulka , iyo waxa dhexdooda ah , bilawba , kan awoodo bilawga abuurkana ma awoodi waayo soo celinteeda .

(b)- waxaan aragnaa dhulka oo nolol leheyn markuu alle ku soo dejinyo roobna wuu cagaaran soona saari noc walba oo quruxsan , allihi awooday inuu nooleeyo marka ay dhimatay ka dib wuu awoodaa inuu nooleeyo metka .

(shan)- kulmiga iyo xisaabta iyo abaalmarinta ;
waxaan rumeeneynaa in lasoo kulmi doono dadka lana weydiin doono , laguna kala xakumi cadaalad , lagana abaal marin doono acmaashodi .

قال تعالى :

﴿ ...وَحَشَرْنَٰهُمْ فَلَمْ نُغَادِرْ مِنْهُمْ أَحَدًا ﴿٤٧﴾ ﴾ [سورة الكهف، الآية:٤٨].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waan kulminay kamana tegin ruux ayaga ka mid ah"

قال تعالى :

﴿ فَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَٰبَهُۥ بِيَمِينِهِۦ فَيَقُولُ هَآؤُمُ ٱقْرَءُواْ كِتَٰبِيَهْ ﴿١٩﴾ إِنِّى ظَنَنتُ أَنِّى مُلَٰقٍ حِسَابِيَهْ ﴿٢٠﴾ فَهُوَ فِى عِيشَةٍ رَّاضِيَةٍ ﴿٢١﴾ ﴾

[سورة الحاقة، الآيات:١٩-٢١].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ruuxii kitaabkiisa midigta laga siiyay waxow leeyahay waakane akhriya kitaabkeyga , aniga waxaan u maleeyaya inaan la kulamayo xisabteyda , asiga nolol raal geliso ayuu ku noolaan "

قال تعالى :

﴿ وَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَٰبَهُۥ بِشِمَالِهِۦ فَيَقُولُ يَٰلَيْتَنِى لَمْ أُوتَ كِتَٰبِيَهْ ﴿٢٥﴾ وَلَمْ أَدْرِ مَا حِسَابِيَهْ ﴿٢٦﴾ ﴾ [سورة الحاقة، الآيتان:٢٥ ، ٢٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:"kiise kitaabkiisa laga siiyo bidixda wuxuu leeyahay shalaytadeydey leyma siin kitaabkeyga , mana

ogaanin xissabteyda "

Xashrigana waa: dadka oo loo soo wado istaagi lagu xisaabi lahaay .

Farqiga u dhexeeya soo saarida iyo kulmintana waxa waaye : soo sarida waa nafta oo loosoo celiyo jirka, kulmintana waa dadka lasoo saaray.

Xisabta iyo abaal marintana waxa waaye : in uu istaajiyo alle adoomanka hortiisa , una sheego acmaashi ay sameeyeen , xissabinta muminiintana waa in alle u soo bandhigo acmaashoodi si ay u ogaadaan naxariista alle ee dushooda ahaatay ahna asturka aduunka iyo danbi dhaafika aakhiro .

Waxaana loo kulminayaa sida uu iimaankooda yahay , malaaik ayaana qaabileyso uguna bishaareyneyso janada , wexeyna ka megan gelineysaa cabsi, iyo musiibada maalinkaan , wajiyada kuwa rumeeyay wey ifi , nuuri , qosli , bishaareysan.

Kuwa beeniyay oo jeestayna waxaa lagu xisaabihaa xisaab adag iyo wax walba oy sameeyeen yar iyo weyn, waxana lagu jiidayaa wajiga maalinta qiyaamo dulen laduleynayo iyo abaal marin looga abaal marinayo waxey gacmahooda hormariyeen iyo waxey benijireen Dadka ugu horreyo oo la xisaabinayo maalinta

qiyaamo waa ummada nabi muxamad-naxariis alle iyo nabadi dushiisa ha ahaatee- , waxaana ka mid ah todobaatan kun oo gelayo janada xisab la‘aan iyo cadaab la‹aan towxiidkooda oo dhameestiran owgiis , waana kuwa uu ku tilmaamay nabiga xadiithka soo socda :

"لا يسترقون ولا يكتوون ولا يتطيرون وعلى ربهم يتكلون " ومنهم الصحابي الجليل عكاشة بن محصن رضي الله عنه

Waa kuwa aan tufid dalbeyn ,is gubeen ,baaseysaneyn,rabigoodna tala saaranayo. waxaana kamid ah saxaabiga weyn cukaashah bin muxsin raali allaha kanaqdee.

Waxa ugu horreeyo oo laga weydiinayo adoomka xuquuqda alle waa salaada, waxa ugu harreyo oo laga weydiinayo xuquuqda adoomankana waa dhiiga .

(Lix )- darka

Waxaan rumeyneynaa darka nabiga -naxariis alle iyo nabadi dushisa ha ahhtee-waana dar weyn iyo dhaan deeqsi ah , biyahana wexy uga yimaadaan webiga "kowthar" layihaado oo janada kuyaal,waxaan u soo aroorayo mumin-iinta umada nabi muxamad .

Tilmaamihiisana waxaa ka mid ah : waa mid ka cad caanaha , ka qabow brafka , ka mac malabka , ka udgoon miski (cadar aad u

udgoon),aad ayuuna u balaranyahay, balla-ciisa iyo dhirirkiisana waa isla egyahay, dhinac walba oo dhinacyadiisa ka mid ahna inti bil loo socdo ayuu jiraa, laba masharaaf oo janada uga keenaya ayuu leeyahay , weelashiiisana wey kabadan yihiin xidigaha cirka , qofki hal kabasho ka cabana weligii ma oomayo .

قال النبي صلى الله عليه وسلم : ( حوضي مسيرة شهر ، ماؤه أبيض من اللبن ، وريحه اطيب من المسك ، وكيزانه كنجوم السماء ، من شرب منه فلا يظمأ أبدا ) رواه البخاري .

Nabiga wuxuu yiri : darkeygu waa inti bil lo socdo , byihiisan wey ka cadyihiin caanaha , weyna ka udgoonyihiin miski, weelashiisunaxidigaha ayay la mid yihiin , ruuxi ka cabo ma oomayo waligii " bukhaari baa weriyay.

(Todobo) -shafaacada :

Markuu mowqifku(istaagu) dheeraado beladuna adkaato, waxey dadku socanayaan shafeeco qaad loo weydiinayo rabigood si uu ukala xisaabiyo,markaa bey cudur daaranayaan kuwi goaanka lasiiyay oo ugu fadliga badnaa rusuulada, illaa ay u yimaadaan nabi muxamad -naxariis alle iyo nabdi dushiisa ha ahaatee- markaa buu istaagayaa istaag ay ku mahdinayaan kuwi hore iyo kuwi danbe ,

waxana cadaaneyso darajada weyn uu leeyahay , markaa buu sujuudayaa carshiga hoostiisa ,allaana ku hanuuninayo mahad uu ku mahadinayo alle kuna weyneynayo, markaa buu u idmayaa in uu u shafaaco qaado khalqiga si lookala xakumo kadib markuu ku dheeraaday istaaga dhib iyo murug eeyan awoodina ku dhacday.

قال صلى الله عليه وسلم : إن الشمس تدنو يوم القيامة حتى يبلغ العرق نصف الأذن فبينما هم كذلك ، استغاثوا بآدم ثم بابراهيم ثم بموسى ثم بعيسى ثم بمحمد صلى الله عليه وسلم ، فيشفع ليقضي بين الخلق فيمشي حتى يأخذ بحلقة الباب ، فيومئذ يبعثه الله مقاما محمودا يحمده أهل الجمع كلهم ) رواه البخاري .

nabiga wuxuu yiri :" qoraxda ayaa soo dhawaaneyso maalinta qiyamo , inti uu ka garo dhididka dhegta barkeed , iyagoo sidaa ah ayay wexey gargaar weydiisanayan aadan kadibna ibraahiin kadibna muuse ka dibna ciise kaibna muxamad naxariis alle iyo nabadi dushiisa ha ahaatee- markaa buu u shafaaca qaadayaa si look ala xukumo khalqiga,wuuna socan ilaa duleelka albaabka uu kagaaro,maalintaas buuna alle ku soo sarayaa maqamki lamahdiyay oy ku mahdinayeen dadka kulanka joogo oo dhan".bukhari baa weriyay .

Shafaacadaan waaye tan la dhaho shafaacada weyn ow rasuulka gaar u yeeshay , waxana u sugnaaday shafaacooyin kale , waxaana kamid ah :

(1)-shafaaca qaadka uu u shafaaca qaadayo ahlu janada in ey galaan janada , daliilkeedana waa hadalki nabiga :

قال صلى الله عليه وسلم:" أتي باب الجنة يوم القيامة فاستفتح، فيقول الخازن من أنت؟ قال:فأقول : محمد ، فيقول : بك أمرت، لا أفتح لأحد قبلك " رواه مسلم .

Nabiga wuxuu yiri: waxaan imaanayaa albabka janada maalinta qiyaamo, markaa baan in layga furo dalbayaa? markaabuu ilaliyihi dhihi: wa kuma adiga. markaa ban leeyahay : waa muxamad , markaa buu leeyahay: adiga inaan kuu furo ayaa ley amray , umana furayo ruux hortaa " muslim ayaa weriyay.

(2)-u shafaaca qaadkiisa qoom uu is la ekaaday wanaagooda iyo xumaantooda, in ey janada galaan , sidaanna waxaa qabo culimada qaar ka mid ah , xadiith saxiix ah oo kusoo aroorayna ma jiro.

(3)-u shafaaca qaad qoom muteen in ey naarta galaan in aysan gelin , shafaacadaanna waxey soo hos gelaysaa xadiithkaan soo socda:

قال صلى الله عليه وسلم :" شفاعتي لأهل الكبائر من أمتي"

Macnihiisuna yahay : shafaacadeyda waxaa leh dadka danbiyada waaweyn geestay oo umadeyda ka tirsan ".abu dawud ayaa weriyay.
(4)- shafaacada uu u qaadayo ahli janada inn darajadooda kor loo qaado , waxaana u daliila :

قوله صلى الله عليه وسلم :""اللهم اغفر لأبي سلمة وارفع درجته في المهديين" رواه مسلم

macnihiisana yahay:allow abii slama danbigiisa dhaaf, darajadisana mahdiyiinta kor ugu qaaad .muslin baa wariyay.
(5)-shafaaca qaadka uu u shafaaca qaadayo qoom gelayo janada xisaab la aan iyo cadaab la aan , waxaana daliil u ah xadiithka cukaasha ibn muxsin uu nabiga ku sheegay todobaatanka kun oo janada xisaab la aan iyo cadab la aan , gelayo .markaa buu weydistay cukaasha inuu nabiga alle u weydiiyo inuu kamid noqdo markaa buu nabiga yiri :

"اللهم اجعله منهم "

"allow ka mid yeel ayaga " saxiix .
(6)-shafaaca qaadka uu u shafaaca qaadayo kuwa danbiyada waa weyn la yimaadeen oo umadiisa ka tirsan oo naarta galeen in ay kasoo baxan , waxaana u daliila xadiithki lasoo dhaafay oo ahaa:

"شفاعتي لأهل الكبائر من أمتي "

Iyo xadiithkaan :

وقوله صلى الله عليه وسلم :" يخرج قوم من النار بشفاعة محمد صلى الله عليه وسلم فيدخلون الجنة يسمون الجهنميين " رواه البخاري .

Uu macnihiisu yahay:waxaaa uga baxayo naarta qoom shafaacada muxamad –naxariis alle iyo nabadi dushiisa ha ahaatee- waxeyna gelayaan janada,waxaa lagu magacaaba jahanamiyin" bukhari baa weriyay .

(7)shafaaca uu u qaadayo kuwa naarta galay in laga khafiifiyo cadaabka, sida adeerkiis abuu daalib , waxaana u daliil ah :

قوله صلى الله عليه وسلم :" لعله تنفعه شفلعتي يوم القيامة فيجعل في ضحضاح من الناريلغ كعبيه يغلي منه دماغه "متفق عليه.

Macnihiisana yahay: waxaa lagayaabaa in ay anfacdo shafaacadeyda maalinta qiyaamo , ee la geliyo meel aan god dheer aheyn oo naarta ka tirsan, wexey gaareysaa qoobabkiisa , maskaxdiisa ayaana la burineyso " waa lesku raacay .

shafaacadana alle aktiisa lagama aqbalayo laba shardi la‘aantood:

(A)-alle inuu raali kayahay kan shafaaca qadayo iyo kan loo shafeeco qaadayo .

(B)- alle inuu u idmo kan shafaaco qaadayo

inuu shafaaco qaado .
waxaana daliil u ah labadaa arimood aayadaha soo socda:

قال تعالى :

﴿ وَلَا يَشْفَعُونَ إِلَّا لِمَنِ ٱرْتَضَىٰ ...﴾ [سورة الأنبياء، الآية:٢٨].

Macnaha aayada waxaa waaye: "uma shafeeco qaadayaan ruxow alle raali kayahay mooyaane qof kale "

قال تعالى :

﴿ ...مَن ذَا ٱلَّذِى يَشْفَعُ عِندَهُۥٓ إِلَّا بِإِذْنِهِۦ ...﴾ [سورة البقرة، الآية:٢٥٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:" kee baa ka shafeeceynayo agtiisa qof uu u idmo mooyane"
(Sided)- miizaanka :
Miisaanka waa xaq waajiba in la rumeeyo , waana waxa uu alle u taagi doono maalinta qiyaamo si loo miizaano acmaasha adoomanka , loogana abaal mariyo, waana miisaan la dareemayo labo kafad iyo carab leh, waxana lagu miisaanayaa acmaasha, ama suxufti acmaasha ku qorred, ama ruuxa laftigiisa , kulligood waa la miisaanayaa, laakiin culeeska iyo fudeedka la doonayo waa kan camalka , ee ma aha kan camalka sameyay a ama suxufta .

قال تعالى :

﴿ وَنَضَعُ ٱلۡمَوَٰزِينَ ٱلۡقِسۡطَ لِيَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِ فَلَا تُظۡلَمُ نَفۡسٞ شَيۡـٔٗاۖ وَإِن كَانَ مِثۡقَالَ حَبَّةٖ مِّنۡ خَرۡدَلٍ أَتَيۡنَا بِهَاۗ وَكَفَىٰ بِنَا حَٰسِبِينَ ﴿٤٧﴾ ﴾ [سورة الأنبياء، الآية:٤٧].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxaan u dhigeynaa miizanadi cadaalada maalinta qiyaamo , lama dulminayo naf waxba , haba ahado wax ku miisaana xabad khardala(waxa u yar) waan keenay, waana ku filannahay xisaabiya yaal "

قال تعالى :

﴿ وَٱلۡوَزۡنُ يَوۡمَئِذٍ ٱلۡحَقُّۚ فَمَن ثَقُلَتۡ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡمُفۡلِحُونَ ﴿٨﴾ وَمَنۡ خَفَّتۡ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓاْ أَنفُسَهُم بِمَا كَانُواْ بِـَٔايَٰتِنَا يَظۡلِمُونَ ﴿٩﴾ ﴾ [سورة الأعراف، الآيتان:٨ ، ٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:"ruuxi uu cuslaado miisankiisa kuwaas ayaga waaye kuwa liibaanay, ruuxow fududaado miisaankiisa kuwaas waaye kuwa qasaaaray naftooda, wexey ahaayeen kuwa aayadaheena dulmiya darted "

وقال صلى الله عليه وسلم :" الطهور شطر الإيمان ، والحمد لله تملأ الميزان

Wuxuu yiri nabiga: Dahuurka waa iimaanka barkiis , alla ku mahdina miisaanka ayay buuxisaa" muslim ayaa weriyay.

وقال صلى الله عليه وسلم :" يوضع الميزان يوم القيامة فلو وزن فيه السموات والأرض لوسعت " رواه الحاكم .

Macnihiisana: miisaanka ayaa ladhigayaa maalinta qiyaamo,hadii lagu miisaano samooyinka iyo dhulkana waa qaadi lahaa. " xaakim ayaa weriyay.

(Sagaal) - siraadka :

Waxaan rumeynay siraadaka oo ah jisri ama buundo la dulsaaray jahanamo , waana jid aaad u cabsi badan, waxaa loo mrayaan janada , dadka qaar il biriqsi ayay ku marayaan , qofna sida biriq, qofna sida dabeel ,qofna sida shinbir , qofna sida fardo orod badan, qofna sida rar jiid, isagoo rucleynayo, kan ugu danbeeyo kuwa marayo waa lajidayaa jiiditaan , wexeyna ku marayaan acmaashoooda inta ey aa egtahay illaa uu ka maro kan uu nuurkiisa la egyahay suulka lugtiisa, qaarna waa la dafaya oo lagu tuuri naarta , qofki dul maro siraadkana janada ayuu gelayaa .

Qofka u horreeyo oo marayana waa nabigena muxamad-naxariis alle iyo nabadi dushiisa ha

ahaatee- ka dibna umadiisa , mana hadlayo maalintaa rususha mooyaane ruux kale , rususha ducadoodana maalintaa waa: allow nabadgeli allow nabadgeli , jahamana wexaa dhex ahaaday mudacyo galoolan oo ku yaalo siraadka labadiisa dhinac –alle kaliya ayaa tiradooda garanayo –wexey dafeysaa qofkuu doono alle oo khalqigiisa ka tirsan .

Tilmaantiisana waxaa kamid ah : seef waa ka af badanyahay , tintana waa kayar yar yahay , waa sibibax aan cagtu ku istaageen (qofkuu alle ku istaajiyo mooyaane) , meel mugdiya ayuuna ka taaganyahay , waxana la dirayaa amaanada iyo qarabada, wexeyna istaagayaan siradka labadiisa dhinac si ay ugu marqaati kacaan qofki ilaaliyay ama kii dayacay.

قال تعالى :

ا وَإِن مِّنكُمْ إِلَّا وَارِدُهَا ۚ كَانَ عَلَىٰ رَبِّكَ حَتْمًا مَّقْضِيًّا ﴿٧١﴾

ثُمَّ نُنَجِّي الَّذِينَ اتَّقَوا وَّنَذَرُ الظَّالِمِينَ فِيهَا جِثِيًّا ﴿٧٢﴾ ﴾

[سورة مريم، الآيتان: ٧١، ٧٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ma jiro ruux idinka mid ah illaa uu u soo aroorayo (jahanamo ) waxow ahaaday(aroorkaas) alle dushiis wax waajib ku ah la dhameeyayna , ka dibna waxaan badbaadineynaa kuwa dhoors-

ady (alle ka baqay) , daalimiinta waxaan uga tegeynaa dhexdeeda ayagoo jilbaha u fadha "

وقال صلى اله عليه وسلم :" ويضرب الصراط بين ظهراني جهنم فاكون : أنا وأمتي أول من يجيزه " رواه مسلم .

nabigana wuxuu yiri : waxa la dhigi doonaa siraadka jahanamo dusheeda,waxaana ahaana-yaa aniga iyo umadayda kuwa ugu horeyo ee ka gudbo." Muslim ayaa weriyay..

Waxaa kale uu yiri :

ويضرب جسر جهنم .. فأكون أول من يجيز ودعاء الرسل يومئذ اللهم : "سلم سلم" متفق عليه

Macnahana : waxaa la dhigi doonaa jisriga jahanamo,waxaana ahaanayaa kan ugu horeeyo ee ka gudbo , ducada rusushana maalinkaas waa: allow nabadgeli allow nabadgeli"

abu saciid al khudri waxuu yiri :" waxaa isoo gaaray in buundada ay ka yar yar yartahay tinta , kana af badan tahay seefta " muslim baa weriyay.

Nabigana wuxuu yiri.

قال صلى الله عليه وسلم:" وترسل الأمانة والرحم فتقوم على جنبي الصراط يمينا وشمالا ، فيمر أولكم كالبرق ....ثم كمر الريح ، ثم كمر الطير وشد الرحال ، تجزى بهم أعمالهم ، ونبيكم قائم على الصراط ،

يقول : رب سلم سلم ، حتى تعجز أعمال العباد ، حتى يجيء الرجل فلا يستطيع السير إلا زحفا قال وعلى حافتي الصراط كلاليب معلقة مأمورة بأخذ من أمرت به فمخدوش ناج ومكدوس في النار " رواه مسلم .

Macnihiisana : "… waxaa la dirayaa amaanada iyo qaraabada ,waxey istaageysaa siraadka labadiisa dhinac midig iyo bidix , wuxuuna u marayaa kina ugu horreeyo sida biriq … kadibna sida socodka dabeesha,kedibna sida socodka shinbirta , kedibna sida jiididararka, waxaa lagu marinayaa acmaashooda, nabigiinana siraadka ayuu istaagsanyahay wuxuuna leeyahay : allow nabad deli allow nabad geli , inta ay ka caajisto acmaasha adoomanka,uu ka yimaado ninka awoodina waayo socod inuu doboda ku riigto maahane , labada dhinac ee siraadkana waxaa ah kalaaliib taagan oo amran in ay qaado qofki loo amro , mid asoo dhaawacan badbaado iyo mid lagu tuuro naarta " muslim baa weriyay.

(Toban) - qandarada (buundo)

Waxaan rumeyneynaa muminiinta marka ay dhaafan siraadka in la istaaji doono buundo , u dhexeyso janada iyo naarta, si loogu kala qisaaso inta aynan janada gelin , marki la saafi yeelo ayaa loo idmayaa gelida janada .

قال صلى الله عليه وسلم :" يخلص المؤمنون من النار فيحبسون على قنطرة بين الجنة والنار ، فيقتص لبعضهم من بعض مظالم كانت بينهم في الدنيا حتى إذا هذبوا ونقوا أذن لهم في دخول الجنة ، فو الذي نفس محمد بيده لأحدهم أهدى بمنزله في الجنة منه بمنزله كان في الدنيا " رواه البخاري .

Nabiga wuxuu yiri:"waxaa laga badbaadinayaa muminiinta naarta , waxaana la istaajinayaa buundo u dhexeyso janada iyo naarta, markaa baa looga kala aarayaa dulmiyo dhexdooda eheyd Markey aduunka joogen ,marki la siffee-yana waxaa loo idmaa gelida janada , waxaan ku dhaartay kii nafta muxamad gacantisa ay ku jirtaye midkood waa kayaqan guriga uu janada ku leyahay kan uu ku lahaa aduunka " bukhari baa weriyay.

(Kow iyo toban) - janada iyo naarta :

Waxaan rumeyneynaa janda in ay xaq tahay , naartana xaq tahay , jiraanna, dhamaaneynna , daaimna yihiin , naciimka ahlu janadana ma dhamaanayo mana suulayo , cadaabka ahlu naarka uu alle ku xukmiyay in ay ku waaraannaweligii ma goayo, muwaxidiintana(alle kali yeelay) waxaa looga saarayaa naarta haday galaan shafeeco qaaad , ama naxariista kan ugu naxariis badan kuwa naxariisto.

Janadana waa daarti karaamada ee alle u

diyaariayay , waxaa dhexdeeda ahaaday wabiyo socdo iyo qolol sareeyo , iyo naago wanaagsan , waxaana dhexdeeda ahaaday wax walba oy nafta jeceshahay , ishana macaansato ,ilna eyan arag,dheguna maqlin, qalbi basharna kusoo dhicin , ma dhamaanayo mana go ayo, iyagoo waarayo gudaheeda, in u dhiganto karbash oo ayada ka mid ah ayaa ka kheyr badan dunida iyo waxa dhexdeeda ahaaday , udgoonkeedana wuxuu gaarayaa meel afartan sano loo socdo,naciimkeeda kan u weynna waa aragtida ay miminiinta indhahooda ka arkayaan rabigood .

Gaaladuna aragtida rbigood waa laga qariyay , qofki diiday oo inkiray aragtida muminiinta rbigood waxow kala mid dhigay gaalada loo diiday .

Janadana waa toban darajo , darajad walba iyo tan xigto waxaa u dhexeeyo inta u dhexeyso samada iyo dhulka oo kale , janada u sareysana waa fardowso , carshiga alle ayaana saqaf u ah , waxeyna leedahay sided albaab , albaab walbana labadiisa dhinac waxey isku jiraan inta ay isku jiraan maka iyo hajar , waxaana imaandoonto maalin uu cariiri la buuxo , ahlu janada kuwa ugu darajo hooseeyo waxey leeyihiin aduunka oo kale iyo tobankiis .

قال الله تعالى عن الجنة :

﴿ أُعِدَّتْ لِلْمُتَّقِينَ ﴿١٣٣﴾ ﴾ [سورة آل عمران، الآية:١٣٣].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxaa loo diyaariyay kuw alle ka cabsaday"

وقال تعالى عن خلود أهل الجنة وأنها لا تفنى :

﴿ جَزَآؤُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ جَنَّـٰتُ عَدْنٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَـٰرُ خَـٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۖ رَّضِىَ ٱللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا۟ عَنْهُ ۚ ذَٰلِكَ لِمَنْ خَشِىَ رَبَّهُۥ ﴿٨﴾ ﴾ [سورة البينة، الآية:٨].

Macnaha aayada waaa :" abaal marintooda alle aktiisa waa jannooyinka cadni, waxaa socdo hoosteeda wabiyada ayagoo ku waaraya waligood, allaa ka raali noqday , iyaguna wey ka raali noqdeen , kaasna wuxuu u sugnaaday kuwa ka cabsaday rabigood "

Naartana waa darti cadaabka , uu alle u diyaa-riayay gaalada , iyo kuwa caasiyay , waxaa dhexdeeda ahaaday cadaab kan ugu daran iyo ciqaabyo kala duduwan , ilaaladeedana waa malaaik aad u adadag una daran , gaaladana way ku waarayaan , cuntadoodu waa zaquum (geed) cabitankoodana wa biyo kulul , naarta aduunka waa qebka mid ah todobaatan marki loo qeybiyo kulelka jahanamo , wexeyna dheertahay lixdan iyo sagaal qeeb oo lamid ah

ama ka kulul kana daran .
nartaanna kama daaleyso qofki la dhexdhigo oo lagu turo salkeeda , iskabadhaafe wexey leedahay siyaaado majirtaa? , todobo albaab beyna leedahay , irid kastana wexey leedahay qadar qeybsan.

قال تعالى عن النار:

﴿ أُعِدَّتْ لِلْكَافِرِينَ ﴿١٣١﴾ ﴾ [سورة آل عمران، الآية:١٣١].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxaa loo diyaariyay gaalada "

وقال تعالى عن خلود أهل النار وأنها لا تفنى :

﴿ إِنَّ ٱللَّهَ لَعَنَ ٱلْكَافِرِينَ وَأَعَدَّ لَهُمْ سَعِيرًا ﴿٦٤﴾ خَالِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ...﴾ [سورة الأحزاب، الآيتان:٦٤، ٦٥].

Macnaha aayada waxaa waaye : " alle waa lacnaday gaalada wuxuuna u diyaariyay saciiro ayagoo ku waaraya waligood "
( 3 ) – miraha laga helayo rumenta maalinta aakhiro :
Rumenta maalinta aakhiro waxey leedahay miro waa wyn  waxaana kamid ah :
(1)-rabida falka daacaadka iyo ku dadalkeeda , ajir alle laga rabo dartiis .
(2)- ka baqaida ficilka macsidaa iyo in raali

laga noqdo , cabsi laga cabsanayo cadaabka maalinkaas dartii .

(3)- niyad dhisa muuminka,uu ku ogaanayo waxa ku dhaafayo aduunka inuusan waxba aheyn , alle wuxuu ka rajeynayana aakhiro ey ka weyn yihiin kana wanaagsanyihiin.

(4)-Rumenta soo saarida waxey asal u tahay sacaadada ruuxa iyo ummada, maxaa yeelay insaanka haduu rumeeyo alle inuu soo sarayo khalqiga Markey dhintan kadib,kuna xisaabinayo, abaal marinayana acmaashoda , ugana aarayo kan la dulmiyay dulmilowga, xataa xayawanka , ruuxi arinkaa rumeeyo wuxuu ku toosayaav daacadda alle, sharta raadkeedna way go'aysaa, kherkana umadoo dhan buu wada gaarayaa, wanaag iyo xasiloonidana caam bey noqoneysaa.

# *Rukniga lixaad*
# *Rumeenta dhacdada*

(1) – Cadeenta qadarka iyo ahamiyada ay rumeentiisa leedahay :

Qadarka waa : qadarinta alle waxayaabaha jooga koonka , kuna qadariyay sida cilmigiisu ahaay , xikmadiisuna yeeshay , qadarkuna wuxuu u noqonayaa awooda alle , iyo in uu asiga wax walba awoodo samaynayana wuxuu doono .

Rumeenta qadarkana waxey ka tirsantahay rumenta rabinimada alle , waana mid kamid ah arkaanta iimaanka , mana dhameestimayo iimaanka adoonka asiga la‘aantii.

قال تعالى :

ا إِنَّا كُلَّ شَىْءٍ خَلَقْنَـٰهُ بِقَدَرٍ ﴿٤٩﴾ [سورة القمر، الآية:٤٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:" anagaa wax walba ku abuurnay qadar iyo qiyaas "

وقال صلى الله عليه وسلم :" كل شيء بقدر حتى العجز والكيس و أو الكيس والعجز" رواه مسلم

Nabigana wuxuu yiri : wax walba waa qadar xataa awood la aanta iyo caqli badnida , ama caqli badnida iyo awood la aanta " muslim baa weriyy.

(2) - darajooyinka qadarka :

Rumenta qadarka ma dhamestirmeyso hadii aan la xaqiijin afar martabo , oo kala ah :

(1)-Rumeenta cilmiga alle oo waligii jiray oo koobayna wax walba .

قال تعالى :

﴿ أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِى ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ ۗ إِنَّ ذَٰلِكَ فِى كِتَٰبٍ ۚ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٌ ﴿٧٠﴾ ﴾ [سورة الحج، الآية:٧٠].

Macnaha aayada waxaa waaye:" miyaadan ogaan alle in uu ogyahay waxa samada ahaaday iyo dhulka , kaasna kitaab ayuu dhex ahaaday , kaasina alle waa u fudud yahay "

(2)-Rumenta in lagu qoray"looxul maxfuudka " waxa uu alle ogaaday oo ah qadarka ,

قال تعالى :

﴿ مَّا فَرَّطْنَا فِى ٱلْكِتَٰبِ مِن شَىْءٍ ۚ ...﴾ [سورة الأنعام،

الآية:٣٨].

Macnaha aayada waxaa waaye:" kagama tegin waxba kitaabka

وقال صلى الله عليه وسلم : " كتب الله مقادير الخلائق قبل أن يخلق السموات والأرض بخمسين ألف سنة " رواه مسلم .

Nabiga wuxuu yiri :" wuu qoray alle waxa uu alle u qadaray khlqiga inta uusan abuurin samooyinka iyo dhulka ka hor konton kun oo sano " waxaana weriyay muslim.

(3)-in la rumeeyo doonida alle oo fushada ah , iyo awooda alle oo wax walba soo hoos gelayaan

قال تعالى :

ا وَمَا تَشَآءُونَ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٢٩﴾ ﴾ [سورة التكوير، الآية:٢٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:"ma dooneysaan alle in uu doono mooyaane , rabiga caalamka "

وقال صلى الله عليه وسلم لمن قال له ماشاء لله وشئت :" أجعلتني لله ندا بل ماشاء الله وحده " رواه أحمد

Nabiga wuxuu ku yiri ruuxi ku dhahay:waxuu alle doono adigana doontid :"ma waxaad iga yeeshay mid alle la mid ah , iskaba dhaafe waa

waxa uu alle kaliya doono" axmad ayaa weriyay.
(4)-rumeenta alle aburihi wax walba in uu yahay .

قال تعالى :

﴿ ٱللَّهُ خَـٰلِقُ كُلِّ شَىْءٍۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ وَكِيلٌ ﴿٦٢﴾ ﴾

[سورة الزمر، الآية:٦٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:"alle waa abuurihi wax walba , asigaa wax walbana wakilka ka ah "

قال تعالى :

﴿ وَٱللَّهُ خَلَقَكُمْ وَمَا تَعْمَلُونَ ﴿٩٦﴾ ﴾ [سورة الصافات، الآية:٩٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:"allaa idin abuuray iyo waxaad sameyneysaan "

وقال صلى الله عليه وسلم:"إن الله يصنع كل صانع وصنعته"رواه البخاري

Macnaha xadiithkana waxaa waaye:'alle waxuu abuuraa sameeye walbe iyo waxa uu sameeyay" bukhaari ayaa weriyay.
( 3 ) – qeybaha qadarka :
(A) – dhacdada guud ee waxa koonka joogo oo dhan ku dhaceyso , waana waxa alle ku qoray "looxul maxfuudka" inta uusna abuurin samooyinka iyo dhulka ka hor konton kun oo sano .

(B) – qadarka ku saabsan da‘da,waana dhacdada ku dul socoto adoonka laga bilaabo marki lagu afuufay ruuxda illaa iyo ajashiisa inta ay ka dhamaanayso .

(T) – dhacdada sanadka ah , waana dhacdada dheceyso sanad walba , waxaana la qadariyaa dhacdadaas habeenka"laylatu qadri" layiraahdo

قال تعالى :

﴿ فِيهَا يُفْرَقُ كُلُّ أَمْرٍ حَكِيمٍ ﴿٤﴾ ﴾ [سورة الدخان، الآية:٤].

Alle wuxuu yiri asiga oo ka hadlaya habeenkaa :"dhexdeedaa lagu kala bixiyaa amar walba oo xikmad badan "

(J) – dhacdada maalin walba ah , waana dhacdada socoto maalin walba oo cizeyn iyo duleyn iyo siin iy u diidid iyo nooleyn iyo dilid iyo wixi la mida .

قال تعالى :

﴿ يَسْأَلُهُ مَن فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ كُلَّ يَوْمٍ هُوَ فِي شَأْنٍ ﴿٢٩﴾ ﴾ [سورة الرحمن، الآية:٢٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:" waxaa weydiinayo waxa ahaaday samooyinka iyo dhulka , maalinkastana asiga shani ayuu ku jiraa"

( 4 ) –Caqiidada salafka ee ku sabsan qadarka :

ALLE asiga ayaa uumay wax walba rabina u eh iskana leh , waxaana xaqiiqa ah inuu qoray qadarka khalqiga inta uusan ayaga abuurin ka hor , wuxuu qoray waqtiga ay dhimanayaan iyo risqigooda iyo camalkooda iyo waxa ay u danbeyn doonaan oo liibaan ama hoog ah, wax walbana waxuu ku koobay kitaab cad , waxa uu alla doonanana wey ahaadaan waxa uusan doonina ma ahaanin , wuuna og yahay waxa ahaay iyo waxa ahaanayo iyo waxaan ahaanin haduu ahaan lahaay siduu ahaan lahaay , wuuna awoodaa wax walba , wuxuuna hanuuniyaa ruuxuu doono , badiyeeyaana kuu dono , adoomankuna waxey lee yihin doonid iyo awood ay ku sameynayan waxa alle awood siiyo , waxayna ictiqaadsanyihiin adomanku ineyan doonayn alle in uu doono maahane

قال تعالى :

﴿ وَٱلَّذِينَ جَٰهَدُواْ فِينَا لَنَهۡدِيَنَّهُمۡ سُبُلَنَاۚ ...﴾ [سورة العنكبوت، الآية:٦٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:"kuwa nagu dadaalay waxaan ku hanuuninyanaa jidadkeena"

Allana asiga ayaa abuuray adoomanka iyo ficiladooda ayaga ayaana sameynayo sida xaqiiqada ah , xujana uguma sugnaanin alle

dushiis waajib uu kategay ama xaaraan uu sameeyay , isakaba dhaafe alle asiga ayay ugu sugnaatay adoomanka dushooda xujo weyn.
Waxaana banan inaad xujo uga dhigatid qadarka musiibooyinka , laakiin ma banaano in xujo looga dhigto danbiyada, waxana arrinkaas daliil u ah xadiithkaan:" mmuse iyo aadan ayaa dooday , markaa buu muuse yiri : adiga aadamki danbigiisa ka soo bixiyay janada ayaa tahay .
Aadamna wuxuu yiri : adigana muusihii alle u dooratay risaaladiisa iyo la hadalkiisa ayaa tahay markaa baad igu eedeyneysaa amar alle igu qadaray inta uusan khalqiga uumin , aadam ayana muuse ka dood badiyay.muslim aya weriyay.
( 5 ) - falalka adoomanka :
afcaasha alle koonkaan ku uumay labo ayay u kala qeyb saman :
(A)–kuwa alle ku socodsiinayo khalqigiisa, ruuxna taas doonid iyo doorasho kuma laha , doonidda alle uun baa iskaleh ,sida nooleynta iyo dilida , iyo cudurka iyo caafimaadka .
قال تعالى :
ا ﴿ وَٱللَّهُ خَلَقَكُمْ وَمَا تَعْمَلُونَ ﴿٩٦﴾ ﴾ [سورة الصافات، الآية:٩٦].
Macnaha aayada waal soo dhaafay.

قال تعالى :

﴿ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلْمَوْتَ وَٱلْحَيَوٰةَ لِيَبْلُوَكُمْ أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا ۚ ﴾ [سورة الملك، الآية:٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:" kii abuuray dhimashada iyo nolosha si uu idiin ebteleeyo : kiinee baa camal wanaagsan"

(B) – waxa ay sameeyaan khalqiga oo doonida, waxey ku ahaatay doonidooda iyo doorashoodada, maxaa yeelay alle taas ayaga ayuu siiyay wxuna yiri

قال تعالى :

﴿ لِمَن شَآءَ مِنكُمْ أَن يَسْتَقِيمَ ﴿٢٨﴾ ﴾ [سورة التكوير، الآية:٢٨].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ki doono oo adinka idinka mid ah ha tosnaado "

قال تعالى :

﴿ ...فَمَن شَآءَ فَلْيُؤْمِن وَمَن شَآءَ فَلْيَكْفُرْ ۚ ... ﴾ [سورة الكهف، الآية:٢٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ruuxi doono ha rumeeyo ruuxi doonana ha gaaloobo "

Iyagana waa lagu mahdin wixi waagsan, wixi xuna waa lagu eedayaa,allana kuma ciqaabayo adomanka amar ayna doorasho kulaheyn.

قال تعالى :

ا ...وَمَآ أَنَا۠ بِظَلَّٰمٖ لِّلۡعَبِيدِ ﴿٢٩﴾ [سورة ق، الآية:٢٩].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ma ihi aniga mid dulmin badan adoomanka "
Insaankuna waa garanayaa farqiga u dhexeeyo doorashada iyo qasabka , tusaalo ahaan:qof uga soo degay guri dushii jaranjaro , iyo qof laga soo tuuray gurga dushiisa isma lahan,oo kan hore doorasho ayuu ku sameeyay falkaas kan danbana waa lagu qasbay .

( 6 ) – kulminta uumida alle iyo falka adoonka: alle ayaa uumay adoonka iyo falalkiisa , wuxuuna u yeelay doonid iyo awood , adonkuna asiga ayaa sameynayo falkiisa sida xaqiiqada ah ,haduu rumeeyana waxuu ku rumeeyay doonidisa, haduu gaaloobana wuxuu gaaloobay khiyaarkiisa, tusaalo ahaan hadaan dhahno: mirahaan geedkan ayay ka ahaadeen , abuurkaana dhulkaan ayuu ka yimid , macneheedu waxaa waaye ayada ayuu ka sameesmay kana soo baxay, hadii aan dhahnase xag alle ayuu ka ahaaday macnaheedu waxaa waaye alle ayaa uumay , labadaaa hadalna iskama hor imaanayaan ,

sidaas ayayna isku waafaqayaan sharciga iyo qadarka .

قال تعالى :

﴿ وَٱللَّهُ خَلَقَكُمْ وَمَا تَعْمَلُونَ ﴾ [سورة الصافات، الآية:٩٦].

Macnaha aayada waa la soo dhaafay.

قال تعالى :

﴿ فَأَمَّا مَنْ أَعْطَىٰ وَٱتَّقَىٰ ۝ وَصَدَّقَ بِٱلْحُسْنَىٰ ۝ فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلْيُسْرَىٰ ۝ وَأَمَّا مَنۢ بَخِلَ وَٱسْتَغْنَىٰ ۝ وَكَذَّبَ بِٱلْحُسْنَىٰ ۝ فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلْعُسْرَىٰ ﴾ [سورة الليل، الآيات:٥-١٠].

Macnaha aayada waxaa waaye:"kiise baxsha , cabsadana , rumeeyana tii wanaagsaneed , waan u fududeyneynaa tan fudud, kiise bakhiilo iskuna filnaado beeniyana tii wanaagsaneyd waxaan u fududeyneynaa tii adkeed "

( 7 )– waajibka adonka dushiisa ahaaday xaga qadaka :

waxaa waajib uga ah adoonka dhinacaaa laba arrimood :

(1)-in uu alle u kaalmeesto sameynta waxa uu karo iyo ka fogaanshaha waxa laga digay , allana weydiisto inuu u fududeeyo kan fudud

kana fogeeyo tan adag , talana saarto, megan galyesto, ahaadana mid u baahan markuu kheyr samaynayo iyo markuu shar ka fogaanayo

قال صلى اله عليه وسلم :" احرص على ما ينفعك واستعن بالله ولا تعجز وإن أصابك شيء فلا تقل لو أني فعلت كذا لكان كذا ولكن قل قدر الله وماشاء فعل ، فإن لو تفتح عمل الشيطان "

Nabiga wuxuu yiri:ku dadaal waxa ku anfaca-ayo , allana kaalmeyso hana cajisin , hadii ay wax ku asiibaanna ha dhihin hadaan saas samey lahaay sidaa bey ahan leheyd , laakiin dheh alle ayaa qadaray waxa uu doonayna sameeyay , hadiina (dhihida hadii aan saas..) wexey furtaa camalka sheydaanka"

(2)– waxaa ku wajiba inuu ku sabro qadarka murugoonina,ogaadanna taasi in ay xag alle ka ahatay kuna raali noqdo, ogaadana waxa asiibay ma gefi leheyn , waxa gefayna ma asiibi leheen , nabiga wuxuu yiri :

" واعلم أن ما أصابك لم يكن ليخطئك وما أخطأك لم يكن ليصيبك "

macnihiisuna yahay : ogow waxa ku asiibay ma ahayn kuwa gefaya, waxa ku gefayna ma ahayn kuaa ku asiibo "

( 8 )–ku raali noqoshada xuknika iyo qadarka : waxaa loo bahan yahay qadarka in lagu raali noqdo, maxa yeelay waxey ka mid tahay ku

raali naqashada rabinimada alle , waxaana looga baahanyahay muumin walba in uu raali ku noqdo waxa uu alle qadaray , maxa yeelay wax walba uu alle qadaray waa kheyr waana iyo cadaalad iyo xikmad , qofki naftiisa ku degnaato waxi asiibay in aysan dhaafi leheyn wixi dhaafayna inaysan ku dhici leheen , waxaa naftiisa ka baaba‘ay wareer iyo noqnoqosho, waxana noloshiisa dhamaaday cabsi iyo murug , oo kama murugoonayo wixi dhaafay , kamana cabsanayo mustaqbalka , sidaa ayuuna ku noqonayaa dadka kan ugu xaalad wanaagsan uguna naf wanaagsan , uguna qalbi degan,qofki ogaadana in waqtigiisa koobanyahay risiqiisana tirsanyahay cabsi waqtigiisa masiyaadineyso bakhiiltin-imana ma badineyso risiqiisa, wax walbana waa qoran yihiin , qofki ku samro wixi asiibo allana denbi dhaaf u weydiisto wixi danbi ah oo uu geestay , raalina ku noqdo wixi alle dushiisa ku qoray oo musiibaa, wuxuu kulminayaa adeecid alle iyo ku samirka masaaibta .

قال تعالى :

ا مَآ أَصَابَ مِن مُّصِيبَةٍ إِلَّا بِإِذۡنِ ٱللَّهِۗ وَمَن يُؤۡمِنۢ بِٱللَّهِ يَهۡدِ قَلۡبَهُۥۚ

﴿ وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمٞ ﴾ [سورة التغابن، الآية:١١].

Macnaha aayada waxaa waaye:" ma asiibin musiibo idan alle maahane , ruuxi rumeeyo alle wuu hanuuninayaa qalbigisa , alllena wax walba ogaal buu u leeyahay "

قال تعالى :

﴿ فَٱصۡبِرۡ إِنَّ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقّٞ وَٱسۡتَغۡفِرۡ لِذَنۢبِكَ ﴾ [سورة غافر، الآية:٥٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:" sabar , balanta alle waa xaqe,dhaafna u weydiiso danbigaada"
(9) - Hanuunku waa labo :
(1)- Hanuun tusid xaq ah iyo ku toosin,taasina khalqiga oo dhan ayaay usugnaatay, waana tey awoodaan rususha iyo dadka raaco .

قال تعالى :

﴿ وَإِنَّكَ لَتَهۡدِيٓ إِلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ﴾ [سورة الشورى، الآية:٥٢].

Macnaha aayada waxaa waaye:" adiga waxaad u hanuunisaa jidka toosan"
(2) – hanuunin waafajid iyo ku sugid xaqa ah, waana fadli uu ku galadeysanayo alle adoomankiisa ka baqay , cidaan alle eheyna ma awoodo,

قال تعالى :

﴿ إِنَّكَ لَا تَهْدِي مَنْ أَحْبَبْتَ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَهْدِي مَن يَشَآءُ ﴾

[سورة القصص، الآية:٥٦].

Macnaha aayada waxaa waaye:" adiga ma hanunisid ruuxi aad doonto , laakiin alle baa hanuuniyo ciduu doono "

( 10 ) - iraadada (donida) ku jirta kitaabka alle wa labo:

(1)- doonid kowni ah oo alle qadaray , waana doonid saameyneysa dhamaan waxyaabaha jooga , waxuu alle doono wey ahaadan , wuxuu doonina ma ahaanin , waxaana laasim u ah inay dhacdo , laazimna ma aha alle inuu jecelyahay in ay doonida sharciga ah ku xariirsanto mooyaane .

قال تعالى :

﴿ فَمَن يُرِدِ ٱللَّهُ أَن يَهْدِيَهُۥ يَشْرَحْ صَدْرَهُۥ لِلْإِسْلَٰمِ ...﴾

[سورة الأنعام، الآية:١٢٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:"ruuxi uu doono alle in uu hanuuniyo wuxuu u balaariyaa labtiisa islaamka "

(2) - doonida sharciga ah, waana tan alle jecelyahay raalina kayahay, laazimna maaha inay dhacdo in ay la xariirsanto tan kowniga ah mooyaane .

قال تعالى :

﴿ ...يُرِيدُ ٱللَّهُ بِكُمُ ٱلْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ ٱلْعُسْرَ ... ﴾ [سورة البقرة، الآية:١٨٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:" wuxuu idinla doonayaa alle fudeedka , idinlama doonayo culeeska "

Doonida kowniga ah ayaa ka guudsan mida sharciga ah maxaa yeelay mid walba oo sharci ah waa kowni , mid walba oo sharcui ahna ma aha kowni,iimaanka abu baker–tusaalo ahaan – waxa ku taxaxuqay labada iraado.

Gaalnimada abu jahalna waxaa laga helay tan kowniga ah bis, maxaa yeelay alle gaalnimada raali kama aha, mana jecla mana amrayo,iskaba dhaafe wuu necebyahay wuuna xarrimay,wixi daacada ama iimaana alle wuu jecelyahay wuuna amrayaa qofki sameeyana wuxuu u balan qaadayaa ajir iyo xasanaat iyo abal marin, allana laguma caasiyo doonid la aantiisa , mana dhacayaan waxuusan doonin ,

قال تعالى :

﴿ وَلَا يَرْضَىٰ لِعِبَادِهِ ٱلْكُفْرَ ... ﴾ [سورة الزمر، الآية:٧].

Macnaha aayada waxaa waaye:" raali uguma ahan adoomankiisa gaalnimada "

قال تعالى :

ا وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ ٱلْفَسَادَ ﴿٢٠٥﴾ ﴾ [سورة البقرة، الآية:٢٠٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:" alle ma jeclo fasaadka "

( 11 ) – asbaabta celiso Qadarta :

alle wuxuu u yeelay dhacdooyinkaan asbaab celiso sida:ducada,sadaqada,dawada, qada-shada digtoonaanta,dhamaantoodna waa qadar iyo xukun alle.

(12 ) - qadarka waa sirta alle ee khalqigiisa:

dhihida qadarka waa sirta alle oo ahaatay khalqigiisa waxey ku koobantahay dhinaca qarsoon ee qadarka , arrimahana xaqiqadooda sida ay tahayna alle maahane cid kale ma ogo , basharkana ma daalacan karo , sida baadiyeenta, hauunika, dilida, nooleent, diidida , siinta.

كما قال صلى الله عليه وسلم :" إذا ذكر القدر فأمسكوا "

Siduu nabiga yiriba:hadii qadarka la sheego ka qabsada " muslim baa weriyay .

Laakiin dhinacyada kale ee qadarka iyo xikamooyinka laga leeyahay iyo darajaadkiisa wey banaantahay in dadka loo cadeeyo lana ogeysiiyo sida uu nabiga yiri oo kale marki uu jibriil arkaanta iimaanka wey diiyay :

"هذا جبريل أتاكم يعلمكم دينكم " رواه مسلم

Wuxuu yiri : kani waa jibriil oo idiin yimid si

uu idin baro diintina "

(13)- xujo ka dhigashada qadarka :

Ogaanshaha alle wixi qeyb noqonayo ma ogo asiga mooyaane cid kale , waana ka qarson yahay kuwa la faray , qofna xujo kama dhigan karo, mana banaano in looga tago acmaasha isku haleyn leysku haleynayo wixi uu alle qadaray, qadarkuna xujo uma ahan alla dushiis iyo khalqigiisaba , hadii ay baananan leheyd in xujo looga dhigto qadarka waxa la sameynayo oo ah danbiyo lama ciqaabeen ruux daalim ah , gaalna lama dileen , xadna lama oogeen , ruxna dulmi ma daayeen , taasina waa fasaad duunyo iyo diin , oo loo ogyahay, waxaana ku leenahay qofka xujo ka dhiganaya qadarka : ma ogid in aad ahlu jano tahay iyo in aad ahlu naar tahay , hadii aad ogaan leheydna waxba laguma amreen waxna lagaama reebeen , laakiin shaqey allana wuxuu u dhawyahay inuu ku waafajoyo in aad noqoto ahlu janno , saxaabada qaar ayaa waxey dheheen marki ay maqleen axaadiiththa ku saabsan qadarka :" ma eheyn mid kadaddl badan marki hore hadda " nabigana waxuu yiri marki wax laga weydiiyay xujo kadhigashada qadarta

":إعملوا فكل ميسر لما خلق له فمن كان من أهل السعادة فسييسر لعمل

أهل السعادة ، ومن كان من أهل الشقاوة فسييسر لعمل أهل الشقاوة ، ثم قرأ

﴿ فَأَمَّا مَنْ أَعْطَىٰ وَٱتَّقَىٰ ۝٥ وَصَدَّقَ بِٱلْحُسْنَىٰ ۝٦ فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلْيُسْرَىٰ ۝٧ وَأَمَّا مَنۢ بَخِلَ وَٱسْتَغْنَىٰ ۝٨ وَكَذَّبَ بِٱلْحُسْنَىٰ ۝٩ فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلْعُسْرَىٰ ۝١٠ ﴾ [سورة الليل، الآيات:٥-١٠].

Macnihisana yahay : camalfala mid walba waa loo fududeeyay wixi loo abuuray, ruuxi ahaayna ahlu liibaan waxa loo fududeynayaa camalka ahlu liibaanka , ruuxi ka mid ahayna dadka halaagmay waxaa loo fududeynayaa camalka dadka kalaagmay markaa buuna akhriyay aayada ..)) macnaha aayadana waa la soo dhaafay.

(14)– qaadashada asbaabta :

adoonka waxa ku dhacayo waa laba arrimood , mid ay xiiladi ku jirto , kaana kama caajisayo , iyo mid aysan xiladi kujirin kana kama wel welwyo , alle wuu ogyahay masaaibta inta aysan dhicin ka hor , mana ahan cilmigiisa kan sababay dhicida musibada ee asbaabta la xiriirta ayaa sabab u ah , hadii ay tahay sababtu gaabid ka timid dhinaca ruuxa dayacrd uu dayacay asbaabti iyo wixi ka badbaadi laha

darteed asiga ayaa lagu eedeynayaa badbaadin la aanta naftiisa iyo inuu ka tegay asbaabti uu isku ilaalin lahaa .

Asbaab qaadashadana qadarka kama hor imaaneyso iyo talasaarashada, waaba qeb kamid ah , laakiin haduu qadarki dhacdo waxaa waajib ah in raali lagu noqdo , alyiraahdana "allaa qadaray wuxuu donayna sameeyay" laakiin inta aysan dhicin ka hor waa in adoonku uu qaataa asbaabta la baneeyay ee qadrka ku celiyo qadar , anbiyadana waxey qaateen asbaabta ka ilaalineysa cadowgooda iyagoo lagu ayidayo waxyi allena ilaalinayo , rasuulki allana wuxuu ahaa-naxaris alle iyo nabadi dushiisa ha ahaatee- sayidki tala saarta yaasha, mid qadan jiray asbaabta , rabigiisna talo saar adag tala saarajiray .

قال تعالى :

﴿ وَأَعِدُّوا۟ لَهُم مَّا ٱسْتَطَعْتُم مِّن قُوَّةٍ وَمِن رِّبَاطِ ٱلْخَيْلِ تُرْهِبُونَ بِهِۦ عَدُوَّ ٱللَّهِ وَعَدُوَّكُمْ ﴾ [سورة الأنفال، الآية:٦٠].

Macnaha aayada waxaa waaye:"u diyaariya ayaga waxaad kartaan oo xoog ah iyo xirida fardaha , waxad ku cabsi gelineysaan cadawga alle iyo cadawgiina "

قال تعالى :

﴿ هُوَ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلْأَرْضَ ذَلُولًا فَٱمْشُوا۟ فِى مَنَاكِبِهَا وَكُلُوا۟ مِن رِّزْقِهِۦ ۖ وَإِلَيْهِ ٱلنُّشُورُ ﴿١٥﴾ ﴾ [سورة الملك، الآية:١٥].

Macnaha aayada waxaa waaye:"asiga (alle) waa kii idinka yeelay dhulka mid sahlan ee ku socda wadooyinkiisa kana cuna quudkiisa xagiisowna kulmisku ahaan doonaa "

قال صلى الله عليه وسلم :" المؤمن القوي خير وأحب إلى الله من المؤمن الضعيف وفي كل خير ، احرص على ما ينفعك واستعن بالله ولاتعجز ، وإن أصابك شيء فلا تقل لو أني فعلت كذا لكان كا ولكن قل قدر الله ما شاء الله فعل فإن لو تفتح عمل اشيطان " رواه مسلم .

Macnihiisana : muminka xooga leh ayaa ka kheyr badan allana ka jecel yahay midka daciifka ah,kulligoodna waa kheyr,kuna dadaal waxa ku anfacaayo , allana kaalmeyso hana cajisin , hadii ay wax ku asiibaanna ha dhihin hadaan saas samey lahaay sidaa bey ahan leheyd , laakiin dheh alle ayaa qadaray waxa uu doonayna sameeyay , hadiina(dhihida hadii aan saas)wexey furtaa camalka sheydaank"a

(15)– xukunka qofka inkiro qadarka :

qofka inkiro qadarka wuxuu inkiray asal ka tirsan asalada shareecada waana gaaloobay , salfka qaar ka mida baa wexey dheheen:" kulaa

dooda "qadariyada" cilmi, haday diidaana waa gaaloobeen , haday yeelaana waa laga dood badiyay" .

(16)– miraha uu leeyahay rumenta qadarka :

Rumenta qadarka waxey leedahay miro wanaagsan iyo raad fiican,kulana soonoq-oneyso ruuxa iyo mujtamaca wanaag , waxana ka mid ah :

(A) – wuxuu dhalayaa cibaadooyin wanaagsan, sida : ukali yeelida alle , talasaaarashadiisa , cabsidiisa , rajentiisa , malada oo lagu wanaajiyo , samir iy dul qaadasho, ladiririda quusashada , alle oo lagu raali noqdo , alle kaliya in lagu shukriyo , in lagu farxo fadligiisa iyo naxariistiisa , iyo in loo jajabnaado , kibirka iyo isla weyninkana laga tago , iyo in wax lagu baxsho wajiyada kherka oo dhan kalsooni lagu kalsoonyahay alle darted , geesinimo , qanaaco , naf sareysa, hammi dheerid , dadaal , dhexdhexaad ladnaanta iyo dhibka , ka nabad gelid xasadka, caqliga oo laga xureeyo khuraafaadka iyo baadilka , degenashaha qalbiga iyo raaxada nafta.

(B )– Qofka qadarta rumeeyo noloshiisa waxey ku soconeysa dariiq tosan ,oo nicmana ma kibrineyso musiibadana ma quusineyso , wuxuuna yaqiin sanayaa wixi asiibay oo dhib

ah in ay tahay wax alle u qoray ebtelo awged, mana murugoonayo ee wuu sabrayaa.

(T)–wuxuu ka ilaalinayaa asbaabta baadida , iyo khaatimo xumida , maxaa yeelay qadarka waxuu dhalinayaa in uu ku dadaalo toosnaanta , wanaagana badiyo , macsidana ka fogaado iyo waxa haligayo .

(J) – muuminiinta waxuu u dhalaasa in ay uga hortagaan waxyaabaha adadag iyo musiibada qalbi sugan iyo yaqiin dhameestiran iyada oo asbaabtana la qadanayo .

قال صلى الله عليه وسلم :" عجبا لأمر المؤمن إن أمره كله خير وليس لذلك إلا للمؤمن ، إن أصابته سراء شكر فكان خيرا له ، وإن أصابته ضراء صبر فكان خيرا له " رواه مسلم .

Nabiga wuxuu yiri : layaab waxaa leh arinka muminka , arrinkiisa oo dhan waa kheyr , kaasna malaha muuminka cidaan aheyn,haday asiibto ladnaan wuu mahdiyaa kheyr baana u ahaaday , hadii ay dhibaato heshana wuu samara sidaana kher ayaa ugu sugnaaday " muslim ayaa weriyay.